SHEEKO IYO SHAAHID

CABDULLAAHI AXMED BASHIR (TUUMBO)

SHEEKO IYO SHAAHID

Copyright © by Cabdullaahi Axmed Bashir

All rights reserved, No part of this book may be reproduced in any form or by any means, Electronic or mechanical, including photocoping, Recording or by any information storage and retrieval system, with out written permission from the copy right owner,

‘‘Buuggani xuquuqdiisu way dhawrsantahay,Waxba lagama bedeli karo, lama badin karo, lamana minguurin karo iyadoo aan ogolaansho qoraal ah laga heysan qoraaga buugga,’’

Waxii talo iyo tusaale ah fadlan ku soo hagaaji cinwaanada hoos ku qoran:

Cabdullahi Axmed Bashir

Tel: +252617769444

Kismayo

atuumbo05@gmail.com

facebook: life coach trainer,

Daabacaadii: 1aad

SHEEKO IYO SHAAHID

Tusmada buugga

HORDHAC IV

AFEEF VI

HIBEYN VII

MAHADNAQ VIII

ARAGTIDA DAD WEYNAHA I

SHEEKO GOGOL XAAR AH II

ODAY HILOWLE(GOGOL XAAR) V

SAKARIYE IYO SIHAAM (SHAAHID) 1

CANTAR IYO CABLO (SHEEKO) 9

SOOMAALIDII HORE (SHEEKO) 13

SOOMAALIDA MAANTA (SHAAHID) 14

KILIYOBATRA IYO MARK ANTONY (SHEEKO) 16

JECEYLKII JECEYLKA GALAAFTAY (SHAAHID) 17

HORUMARKII JIRAY XIILLIYADII HORE (SHEEKOOYINKA QUR'AANKA) 29

HORUMARKA HADDA JIRA(SHAAHID) 33

XIRIIRKII INSIGA IYO JINKA DHEX MARAY (SHEEKO) 36

BARISAMAADKII IYO SOOMAALIYA, DOWLADDII HORE EE KACAANKA (SHEEKO) 46

SOOMAALIYA XILLIGA COLAADAHA (SHAAHID) 49

FARIINTII ILMAHA AAN DHALAN (SHEEKO) 52

WAAYEELKA MAANTA (SHAAHID) 56

QALANJADII QEYBSAMI WEYDAY (SHEEKO) 62

MURTIDII IYO SUUGAANTII HORE(SHEEKO) 71

SUUGAANTA IYO MURTIDA MAANTA(SHAAHID) 75

MARAAJICDA 78

SHEEKO IYO SHAAHID

HORDHAC

Waxay mahadi usugnaatay Illaah Subxaanahu watacaallaa oo ay awoodiisa iyo naxariistiisa iigu suura gashay inaan qoro buuggan oo gogol xaar iyo hordhacba u ah buugaag aan doonayo inaan mustaqbalka qoro kuwaasoo maankayga kadhax guuxaya.

Waxaan bilaabay buuggan qoridiisa caawa oo ay taariikhdu ku beegantahay 7 Oct 2017

Waxaana ujeedkaan uqoray buuggani isagu jiray ujeedooyin badan oo ay kamid yihiin,

- In aan xasuusaiyo waalidiinta iyo dadka waaweyn in ay jiraan dhalin yaro aanan waayo aragnimo badan ulahayn dowladahii dalka soo maray oo dabcan kadanbeeyey ama dhashay waa danbe, wax walbo dowladahaasi iyo kahor ahna ay ku tahay sheeko, laakiin dadka xog ogaalka ahi ama waayo aragga ah ee usoo joogay, gumeysi ,dowlad iyo dowlad la,aanba ay waaya aragnimadooda lawadaagaan, ugana faa'iideeyn iyaga oo u hoga tusaalaynayo habka ugu wanaagsan oo ay uga bixi karaan dhibaatooyinka jira
- Sidoo kale waxaan buuggani uqoray inay dhalintu ka faa'iideystaan iyadoo uu buuggu ka koobanyahay, sheekooyin jeceyl iyo taariikh,

SHEEKO IYO SHAAHID

- Buuggani waa buuggii ugu horeeyey ee aan qoro marka laga reebo kuwaygii waxbarashada sida buuggii qalinjabinta jaamacadaydii, maadaama aan jeclahay inta aan noolahay inaan qoraa wax laga faa'iido noqdo.
- Iyadoo qof waliba dhacdooyinka maankiisa ku jiraa ay uqeybsamaan sheeko looga sheekeeyey iyo mid uu goob joog u ahaa haddana aniga intaas ayaan waxaan doortay inaan buug kaqoro.
- Waxaan kale oo aan buuggani uqoray inaan soo bandhigo awoodayda curinta sheekooyinka maadaama ay sheekooyinka qaara curis yihiin.

SHEEKO IYO SHAAHID

AFEEF

Waxaan ka cudurdaaraanayaa haddii aqristoow aad lakulanto sheeko ama aragti aadan kuqancin, waxaan ahay bini Aadam waxaana buugga ku saleeyey aqoontayda iyo taariikhda inta aanka haayo, taasoo keeni karta inaanan ugu hagar bixin sida aad adiga doonaysay, buuggani waa kaygii ugu horeeyey inta karaankayga iyo aqoontaydu iyo cilmi-baaristaydu aheydna waan dadaalay,sidaasi awgeed waxii talo iyo tusaalle ah horey ayaan kusoo xusay waan soo dhaweynayaa.

Aqristoow waxaa laga yaabaa inaad aragto sheekooyin curis ah oo aan anigu curiyay ogow sheeko walbo oo buuggani kuqoran waa waxaan aniga goob joog u ahaa iyo wax la iiga sheekeeyey oo aan meel tixraac leh kasoo xigtay, dhawr sheeko oo aan aniga curiyayna way kujiraan.

SHEEKO IYO SHAAHID

HIBEYN

Buuggani oo ah buugaygii ugu horeeyey waxaan uhibeynayaa Hooyaday ***Cibaado Maxamed Cabdullaahi*** *iyo Aabahay* ***Axmed Bashir Maxamud(Tuumbo)***

Oo runtii noloshayda iyo jiritaankayga uu Illaah subxanahuu watacaalaa sabab uga dhigay, iyagoona runtii kaalin mug leh kasoo qaatay koriimadaydii, Tarbiyeynteydii iyo baxnaaninteydii iyagoona sidoo kale igu soo abaabiyay nolol wacan oo diinta Islaamka asal utahay,

SHEEKO IYO SHAAHID

MAHADNAQ

Waxaa mahad oo idil iska leh Allahii ii suurtagliyay inaan buuggan qoro, waxaan sidoo kale halkan uga mahad celinayaa qof walbo oo igala qeyb qaatay, talo igu siiyay ama idhiirigaliyay,

Anigoonan halkan kusoo koobi Karin waxaan ugu horeysiinayaa hooyaday ***Ciibaado Maxamed Cabdullaahi*** *oo aan dhiiri galinta ugu weyn ka heleyay,*

Sidoo kale waxaan mahad gaar ah udirayaa ***Cabdinaasir Axmed Sheekh Bashiir*** *oo ka midka ahaa raggii igu dhiiri galiyay inaan qoro buuggan,*

Waxaan sidoo kale jeclaan lahaa inaan umahad celiyo macalimiintayda Jaamacad Juba oo ila garab taagnaa hiil iyo hooba muddadii aan buuggani qoraayey, waxaanan caawintiisa hagar la'aaneed shaqsiyaadkaasi ii huray ka xusi karaa ***Dr Cabdiraxman Macalin Xasan*** *oo ah Horjoogaha qeybta caafimaadka ee Jaamaca* ***Juba University of Somalia***

Waxaan Sidoo kale u mahad celinayaa ***Cabdirisaaq Sheekh Deeqoow*** *oo ah Suxufi Soomaaliyeed oo isagana igala qeyb qaatay dhanka Tifatirka Buuggani,*

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxaa sidoo kale halkan si gaar ah uga mahad celinayaa ***Proff Cabdullqaadir Nuur Axmed*** *oo qeyb ka ahaa shaqsiyaadkii waqtigooda muhiimka ahaa ku bixiyay tifatirka Buuggan,*

Waxaa kaloo halkan uga mahad celinayaa saaxiibkay ***Cabdullaahi Axmed Maxamuud*** *oo kamid ahaa dadkii iga caawiyay inaan buuggan qoro iyo Ustaadkeyga* ***Mowliid Cabdi Cawad*** *oo isagana gacan ka geystay qoridda Buuggan.*

SHEEKO IYO SHAAHID

ARAGTIDA DAD WEYNAHA

- ***Dr Cabdiraxmaan Macalin Xasan*** *oo ah (Dean) ka kuliyada caafimaadka ee Jaamacadda Juba waxuu yiri ‘‘wali ma arag Buug Af Soomaali ah oo hanaanka Sheeko iyo Shaahid u qoran maxaa yeeley Sheekooyinkiisa waxay isula socdaan labo labo, runtii waa cibro qaadasho Sheekooyinka qaar marka la is garab dhigo,’’*
- ***Cabdirisaaq Sheekh Deeqoow*** *Wariye ka hawl gala Radiyaha Kismaayo, ‘‘waxaan dareensanahay inay dadka waliba dhalinyarada ka faa,iidaysan doonaan buuggani xiisaha leh,’’*
- ***Cabdinaasir Saxansaxo*** *oo ka hawl Galo laanta Afka Soomaaliga ee* ***BBC*** *da, ‘‘Sheeko iyo Shaahid waxuu xambaarsanyaray fariimo wax ku ool ah.’’*
- ***Maxamed Asad Barkhadle ‘‘****Buuggani waxuu bidhaaminayaa aragti cusub oo ku salaysan isbar bar dhigga qisooyinkii hore iyo kuwa danbe,’’*
- ***Khadar Buulle Ibraahim*** *oo ah muwaadin Soomaaliyeed oo kunool gobolka* ***Arizona*** *gaar magaalada* ***Phoenex*** *ee dalka Mareekanka‘‘Sheeko iyo Shaahid, waa buug aan ka heley iina iftiimiyay arimo daah iga saarnaa oo ay kamid tahay, in sheekooyinka jeceyl ee maanta lasoo wariyay eek a qatarsan yihiin kuwii hore, balse aysan helin buunbuunin.’’*

SHEEKO IYO SHAAHID

SHEEKO GOGOL XAAR AH

Akhristow maadaama aynu nahay dad Islaam ah soo kulama habboona inaan anbiyadii iyo ficiladoodi kheyrka ay sameyn jireen kaga dayano, maxaa yeeley anbiyada xitaa hadii ay sheeko caadi ah sheegayaan waxay dadka fari jireen cabsida Alle sheekada kahor,

Bal ila arag qisadan Nabi Yusuf CW,

Nabi Yuusuf markuu xabsiga galay waxaa lasoo galay xabsigii labo wiil oo dhalinyaro ah, Waxayna labadoodaba Nabi Yusuf CW usheegeen riyooyin ay ku riyoodeen, waxayna kacodsadeen inuu ufasiro riyooyinkooda maadaama uu ula muuqday nin wanaagsan,

‘‘Waxuu midkood yiri waxaan ku riyooday anigoo miiraya khamro’’

Waxuu kii kalana yiri ‘‘Waxaan ku riyooday anigoo madaxayga ay saaran tahay Muufo, Muufadaasina ay cuneyso shimbir’’ Bal inooga waran riyooyinkaas waxaan kuu aragnaa inaad kamid tahay kuwa wanaagsan’’,

Nabi Yuusuf CS muusan ku bilaabin sheekada fasiraadda riyadda ee waxuu kow sameeyey hordhac uu isku barayo iyaga isagoona usheegay in Illaahay baray cilmi ah inuu ogaan karo raashinka loo keeni doono kahor inta aanan lookeenin,

Waxuu sidoo kale usheegay inuu kasoo tagay dad aanan Illaahay rumeysneen oo Aakhirana ku gaaloobey, waxuuna kuyiri waxaan raacay Diinta Aabayaashay Ibrahim,Isxaaq iyo Yacquub CS, Noomana sugnaan buu yiri inaan Illaahay u shariig yeelno waxyarba Allah haka dhigee, Taasina waa fadliga Eebe nagu manaystay anaga iy dadkaba laakiin dadka intooda badan ma ahan kuwa Eebe ku shugriya,

SHEEKO IYO SHAAHID

‘‘Saaxiibadayda Xabsiga igula jiroow, ma illaahyo kala duwan baa kheyr badan mise Allaha waaxidka ee Qahaarka ah’’

‘’Waxa aad caabudaysan ma ahaanin illaa magacyo aad idinka bixiseen mooyaane idinka iyo aabayaashiin, Illaahayna uma soo dajin xujo arintaasi, xukunka Eebe ayuu usugnaaday waxaana inagana nalagu amray inaan isaga kaligii caabudno, Taas ayaa ah Diinta toosan laakiin dadka intooda badan ma aha kuwa wax yaqaana’’

Markuu intaasi oo wacdi iyo wanaag farid ah uu yiri kadib ayuu ugalay fasiraada riyooyinkooda, marka aqriste marka qof aad isla joogtaan wax ku weydiiyo inta aadan uga jawaabin makugu soo dhacdaa inaad xasuusiso cabsida Alle?,

Anigana sidoo kale anigoo raacaya wadiiqadaas toosan ee Nabiyullaah Yuusuf ayaan waxaan buuggayga ku bilaabayaa is faridda aan farayo akhristayaasha kayaabida cabsida Eebe iyo inay u hoogaansanaadaan awaamirtiisa,

Maxaa yeeley waxuu Illaahay Qur’aankiisa noogu sheegay inaan kacabsano cabsi dhab ah,

Sidoo kalena Nabigeena Muxamed ﷺ waxuu yiri,

‘‘Illaahay kacabsada meel kasta oo aad joogtaan, xumaantana samaan raaciya way tirtiraysaa dadkana kula dhaqan akhlaaq wanaagsan,’’

Waxuu kaloo Nabigeena yiri NNKH ‘‘*Illaahay kabaqa baryada ama dalabkana badiya maxaa yeeley naf madhimato illaa ay irsaaqadeeda kaamil yeelato haba kasoo daaho hadduu doono’e’’*

Marka hadduu arinka sidaa yahay, waxaa lagama maarmaan ah inaynu is farno cabsida Eebe waxaanan isaga digaynaa inaan qilaafno awaamirtiisa oo aan ku caasino,

SHEEKO IYO SHAAHID

۞ إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُ بِالْعَدْلِ وَالْإِحْسَانِ وَإِيتَاءِ ذِي الْقُرْبَىٰ وَيَنْهَىٰ عَنِ الْفَحْشَاءِ وَالْمُنكَرِ وَالْبَغْيِ ۚ يَعِظُكُمْ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ (90)

''Illaahay waxuu idnku amrayaa cadaaladda, iyo ixsaanka ama wanaagga iyo inaan quudino kuwa qaraabada noo ah, Waxuuna Eebe weyne idinka reebayaa Faaxishada iyo Munkarka iyo caasintiisa Eebe weyne wuu idiin digayaa, waxaadna mudantihiin inaad xasuusataan''

SHEEKO IYO SHAAHID

ODAY HILOWLE(GOGOL XAAR)

Waxaa jiray oday lagu magacaabi jiray Hilowle oo ku noolaa miyiga balse waagiisii danbe magaalada usoo guuray,

Hilawle waxuu ahaa nin seddex xaasle ah oo dhaqankiisa miyiga ku adag, sidaasi darteed xaasaskiisa aad ayay uga baqani jireen,

Hilawle waxay seddexda xaasba udhaleen gabdho tiradoodu tahay kow iyo toban, sidaasi darteed Hilawle waxay danta ku kaliftay inuu inta xoolihiisa xaraasho magaalada soo galo, maadaama aysan jirin wiilal ka caawiya shaqada adag ee Miyiga,

Hilawle sedexdiisa xaas mid qura kuma dhicin inay magaciisa ugu yeerto, Iskaba daaye sidaasi ayaysanba uga nabad gali jirin oo waxuu qoonsan jiray wax walboo uu ree magaalnimo kadhadhamiyo haddii ay kudhaqaaqaan, jeceyl warkiisa daa mamuujin karaan gabi ahaanba,

Ugu danbeyn waxaa Oday Hilawle mid mid looga soo doonay gabdhihiisii, saa tii lasoo doonaba wuu bixiyaa, ilaa middii ugu yareyd laguursado, nasiib daro se waxaa muddo markii lajoogaba lasoo furaa gabar uudhalay oo ilma sidata, ilaa dhamaan ay gurigiisii dib ugu soo noqdaan iyagoo culaab iyo culeys sita,

Oday Hilawle talaa kawareertay waxuuna garan waayay halka wax kaqaldanyihiin, laakiin waxaa ugu danbeyn uxog waramay Oday Muuse Nuur oo ay deris ahaayeen, isagoona u sheegay in gabdhihiisu ay dhawrsoon yihiin akhlaaq xumo kalena aysan qabin, balse aysan aqoon hab maamuuseedka ragga loola dhaqlo iyo jeceylka qoyska kudhismo, taasina ay sababtay iyagoo awal miyiga kusoo barbaaray iyo isaga kakanaantiisa maxaa yeelay waxay cashiro kaqaateen sidii hooyooyinkooda loola soo dhaqmi jiray oo gabi ahaanba aheyd hab qaldan.

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxaan sheekadani uga gol leenahay, Jeceylka waa tiirka qoyska labada qof ee is guursadaana ay qasab tahay inay isu muujiyaan,

Waxaa sidoo kale aan wax dhib ah laheyn haddii jecelka wax laga qoro ama bulshada loo bidhaamiyo, Jeceylka iyo waxuu yahay,

SHEEKO IYO SHAAHID

SAKARIYE IYO SIHAAM (SHAAHID)

Sakariye iyo Sihaam waxay ku dhasheen kuna barbaareen Magaalada Kismaayo ee gobolka Jubada Hoose sanadihii 1991dii iyo 1995tii,

Afar sano oo qura ayeey ka yareyd Sihaam Sakariye, Sihaam oo uu dhalay Suldaan caan ah oo aad loo ixtiraami jiray.

Bilawgii 2008dii ayay Sihaam iyo Sakariye isku Barteen Madaraso ay dhiganayeen, halkaas oo ay muddo isku xiriirin jireen si walaaltinimo ama saaxiibtinimo ah iyagoonan wax jecel ah uusan dhax marin .

Labo sano markay Xirirkaas Walaaltanimada ah isla wadeen ayaa sheekadoodii baahday oo meel walba laga sheegay isu dhawaanshahooda iyadoona ay dadku ku micneeyeen in ay xiriir Saaxiibtinimo wadaagaan.

Shuuxshuuxdaasi iyo Xantaasi ayaa waxay gaartay waalidiinta Sihaam oo iyagu ahaa dad ku adag dhaqanka iyo soo jireenka umadda Soomaaliyeed kana soo horjeeday Ilbaxnimada Reergalbeedka laga keenay ee kusalaysan Saaxibtinimo qoto dheer oo dhax marta wiil iyo gabar aan xarig isu heyn.

SHEEKO IYO SHAAHID

Iyagoo kaduulaya aragtidooda ayay xakamo iyo Ilaalin kusoo Rogeen Sihaam oo iyadana iska aheyd qof dhawrsoon oo Akhlaaq udhalatay, Sidoo kale waxaa Sihaam laga Mamnuucay isticmaalka Isgaarsiinta khaaska ah sida Telefoonka Gacanta (Mobeylka),

Balse arintaasi waxay saameysay Sakariye oo si dhab ah udareemay inuu Sihaam Jecel yahay uusanna sinaba oga maarmin taasoo markii hore uusan ku baraarugsaneen,.

Talo waatii Rabiye, Sakariye xal wuu uwaayay arintiisa oo ahayd inuu mar un arko Sihaam si uu ugu yaraan ugu sheego inuu Jecelyahay iyada,

Mar waxuu qoraa Waraaq uu si qurxan uxardhay haddana way la ahaan weysaa, mar waxuu ag yimaadaa guriga Sihaam balse waxaa laga siibaa wadnaha oo isagoo baqanaya ayuu noqdaa oo is qariyaa,

Sakariye waxuu xaalkan ku sugnaa muddo afar bilood ah isagoona ka go'ay cuntadii sidoo kalena waxuu isaga tagay wax barashadii.

Sakariye ehelkiisa ma aysan garan halka baruurta ka qurunsantahay balse waxay utog hayeen in Sakariye yahay dhalinyaro wax walba kasuurooba oo waxay si dhaw ula socdeen dhaqdhaqaaqiisa iyagoona shaki kaqaba bal inuu ninkani maagan yahay Tahriib iyo inuu dalka isaga baxo,

SHEEKO IYO SHAAHID

Laakiin xaalka sakariye kaasi waaka duwanaa oo inuu tahriibo iska dhaafee ma aheyn nin ogol inuu si sharci ah dalka uga baxo waayo waxaa dalka ka yaalla wax waxaasi oo dhan uga qiimo badan, waxaa dalka ka yaalla Johorad aanu dibadda kaheleyn hadduu dal walbo tago,

Sihaam iyadu sidaa Sakariye ma aheyn balse waxay taweysaa iskaashigii iyo wada sheekeysigii wacnaa ee udhaxeen jiray iyada iyo Saaxiibkeed, Waxay dareemeysaa cidlo oo dhinac baa dabeel uga furan wallow aysan cuntada ka go'in,

Waxaa layiri dadku haduu noolyahay mar unbuu is arkiye waxaa lagaaray ciida Arafo oo ku beegneed maalin Isniin ah, Waxaa la isagu soo baxay garoonka weyn ee kubada cagta ee magaalada si loogu tukado salaadda halkaasoo ay Sihaam la timid gabdho ay daris ahaayeen.

Sakariye qudhiisa halkaa ayuu Salaadda ujoogay balse marna kumuusan xisaabtamin inay Sihaam meesha joogi karto waxaase fikirkiisa been tiri Sihaam oo si lama filaan ah gadaashiisa katiri, Sakariye!!!,

Soo jeedsasho kadib waxaa isla markiiba maskaxdiisa kusoo dhacay boqol fal celin oo muujin kara Hilowga iyo Hamigiisa heerkuu la ekaa, Maku Boodaa oo Hab Masiisaa?, maye Madhunkataa? Mise waad xanbaartaa?. Ayuu isweydiiyay.

SHEEKO IYO SHAAHID

Laakiin intaba suura gal ma aheyn waayo Islaanimada ma ogola in qof ajnabi kaa ah aad taabato, Islaanimo kadibna goobta lajoogo ayaa waxay aheyd Goob ay bulsho isugu timid.

Iswareysi iyo ismarxabeen kadib ayay Sihaam cod murugo leh kutiri ‘‘Sakariye Aboowe Maxaa sidaan ogu Baaba’day?’’

Sakariye ood moodo in su’aashaasi lagala daahay ayay ilin soo dhaaftay waxuuna yiri isaga oo ay Ilmadu Hibitiqleynayso, ‘’ Jeceyl!!!, waxa sidan iigalay waa jeceylkaaga oo igu laxaadsaday waxaanan dareemay inaan kujeclahay kadib markaan is weynay, Abaayo markii aanku waayay waxaan kusoo dhacay meel cidlo ah, waxaan waayay Saaxiibtaydii Rumaad, Walaashaydii garabka ii aheyd iyo halka Wehel aan kulahaa magaalada, Waxaa igalay jeceyl ay igu adkaatay qofkaan jeclaa inaan arko, waxaan dhibkaasi kujiraa shan bilood oo kaamil ah, Sihaam abaayo haddii aad dhibkaasi ila qabto isoo dhawee haddii aadan ijecleyna kuma qasbaayo balse ogow inaan dartaa udhibanahy”.

Sihaam madaxa ayaa weynaaday, Su’aasha ayaa ku adkaatay jawaab rasmina way u weysay, Sakariyana wayka aamusi waysay lakiin waxay ka codsatay inuu iska baxo oo ay iyadu jawaab sax ah soo siini doonto ayna usoo qori doonto waraaq,

SHEEKO IYO SHAAHID

Salaadii Ciida ayaa latukaday waana lakala huleeley ruux walbana waxuu aaday gurigiisii,

Sihaam Jawaabta waxay kuqaadatay Shan maalin laakiin shantaasi maalina waxay dharar ku aheyd Sakariye oo xaqiiqdii Sihaam ujeclaaday si ka baxsan sida caadiga ah,

Malintii lixaad ayay Amal oo ay saaxiib iyo darisba ahaayeen Sihaam ukeentay Waraaqdii Sakariye waxayna Amal lambarkeeda u qortay Sakariye,

warqadda waxay u qorneed sidatan,

Ka: Naf Wax Jecel

Ku: Naf Lajecelyahay

Aboowe Marka hore Salaan Qiimo badan iga Gudoon, Salaantaasoo kaaga timid Naf kuu Hilowde,

Aboowe waxaan kaa raali galinayaa jawaabta aan kaala daahay, Runtii waxaa isoo martay shan maalin oo iiga daran shan boqol oo sano waxaan ku fikiray wax walbo, waxaan ugu danbeyn talo saartay Illaah subxaanahuu watacaalaa,

Gacaliye waxaa tahay jecelkeygii ugu horeeyey oo aanan nasiib uhelin inaan waqti laqaato, waxaan noqday qofka dunida ugu nasiibka badan waayo adiga ayaan ku jeclaaday, hadana waxaan noqday qofka dunida ugu

nasiibka daran waayo waxa iga kaa hortaagan duruufo iyo darbi adag oo aanan ladumin Karin,

Xabiibi Waalidkayga waxay igu darayaan nin oday ah oo uu Aabo iisiiyay godob reeb arin soo dhax martay reerkeena iyo reerka ninkaasi uuka dhashay,

Aniga madiidin mana diidi karin maadaama uu aabahay yahay Suldaan,

Aboowe aniga inaan kujeclahay waxaan ogaaday markaad adiga iisoo bandhigtay jeceelkaaga arintaan siismadana way kahoreysay kulankeena oo Aabo hore ayaan oga aqbalay guurka,

Hadda adiga ayaa talada kuudhiibanayaa, Mawaalidkayga ayaan ku gacan seyraa oo jeceylkayga ayaan doortaa, mise Ducada waalidkayga ayaa dalbaa oo jeceylkayga ayaan cidleeyaa?,

Gacaliye hadaad iga codsato xitaa inaan labadeena nafteena gooyno waankaa yeelayaa Jawaabta adigaan kuu dhiibay oo aan kaasugayaa, waxaanan sameyn doonaa waxaad ifarto xabiibi ha is oran nin ayay kaa raacaysaa Sihaam aniga adigaa ii taliya Macaane, Waxii jawaab ah fariin iigu soo dir telefanka Amaal,

SHEEKO IYO SHAAHID

Waa Gacalisadaada Sihaam,,,

Kadar oo Dibi Dhal arin ayaa sakariye kucadaaday waxuu suubiyo ayuu garan waayay, waxuuna ugu danbeyn latashtay Sheeq Ilyaas oo imam ka ahaa masaajid gurigooda ku dhaganaa, Sheeqa ayaa si fiican ugu wacdiyay isagoona ku sabarsiiyay inuu Illaahay Talada saarto oo uu labo rakaco tukado gabadhana faro inay adeecdo waalidkeeda oo aysan ku caasin iyagana ay Illaahay dartii ku sabraan,

Wadiiqadii uu sheequ tilmaamay ayuu Sakariye maray sihaamna waxuu ku amray haddii ay isaga dhab ujeceshahay inay waalidkeeda adeecdo,

Sihaam way qaadatay taladii iyadoona uurka ka gubanaysa, bil kadibna waxaa aroosay odaygii,

Sihaam waxay Reer Laheyd Sedex sano iyadoonan wax ubad ah udhalin Oday Jaamac oo ahaa ninka loo siiyay godob reebka , Sanadkii afaraad ayaa waxaa tii rabi utimid odaygii oo waala oofsaday,

Sihaam asaay ayay qaaday asaaydii markii ay kadhacdana waxay dib uraadisay Jeceylkeedii hore oo xir kutubada raacato kamid ahaa, arimahii ayay ufaahfaahisay waxayna si xurmo leh uga codsatay inuu soo doono, Sakariye oo aaminsan in Illaahay sabarkiisa

SHEEKO IYO SHAAHID

ka abaal marinayo ayaa Sihaam ka aqbalay wuuna doonay, Waxaana la isagu daray siismo iyo meher halkaas ayuuna ku hantiyay Jecelkiisii, Sihaam iyo Sakariya waxay hadda is qabaan 7 sano iyagoo isu dhalay shan ciyaal ah.

Waxyaabaha Sheekadan laga Faa'iidaysan karo

1) In Soomaalidu hiddo iyo dhaqan uleedahay in ay gabdhahooda ubixiyaan si loogu damiyo Utuno ama Godob hore waxaana guurka ceynkaan ah looyayaqaanaa Godob Reeb,
2) In sharafta gabadha iyo tan reerkaba ay ku jirto inuu gabadha Aabaheed bixiyo iyadana adeecdo,
3) Inay mamnuuc tahay in gabadh iyo wiil ajnabi kala ah ay is taabtaan oo aysan diinta qabin sidaa,
4) In Sabarku yahay ficilka wanaagasan Illaahayna ka abaal mariyo qofka sabra,
5) In dhaqanka iyo diintaba nafarayso in haweenaydu asaay qaadayso hadduu ninkeeda geeriyoodo,

SHEEKO IYO SHAAHID

CANTAR IYO CABLO (SHEEKO)

Cantara Ibnu Shadaad Al Cabsi waxuu ahaa geesi Noolaa xiligii Jaahiliga ee Nabi Maxamed ﷺ kahor,

Cantara waxaa dhalay nin lagu magacaabi jiray Shadaad oo kadhashay ree Binu Cabsi, Hooyadiisana waxay aheyd Zabiibah oo aheyd naag Xabshi ah oo uu Shadaad adoonsanayay,

Cantara Waxuu raacay midibka hooyadii oo waxuu ahaa nin madaw waxaana isaga qudhiisa adoonsanayay aabahiis oo raacsan jiray xoolaha,

Sidaasi darteed waxuu si adag ubartay hanaanka loo dagaalamo intii uu xoolaha raacayay waxuuna noqday nin ad adag oo aysan cidina is hor taagi Karin, isaga oo xaaladaa adoonsiga ku sugan ayuu jeclaaday Cablo oo aheyd gabar uu dhalay adeerkiis oo ahaa boqorka ree Binu cabsi,

Cablo waxay ahayd gabar quruxi Illaah udhameeyey oo ina boqor ah mana ahayn ruux ay dadku maleysan kareen inuu damci karo Cantara oo uu aabahiis adoon u ah,

Haseyeeshee Cantara maniyad jabin oo waxuu had iyo jeer kudadaali jiray sidii uu sumcaddiisa dib ugu hanan lahaa,

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxaa maalin maalmaha kamid ah dhacday in Cantara Reerkooda ree Binu Cabsi lasoo weeraro lagana itaal roonaado, taasina ay kalifto in Cantara Aabihiis u uyimaado isgaoo geed hoos fadhiya kana Codsado inuu dagaalamo, balse Cantara ayaa aabihiis ku celiyay jawaaab guracan oo uu ugu sheegayo inaanu adoonka dagaalamine ee xoolaha oo kaliya uu raaco,

Aabahiis ayaa ugu jawaab celiyay dagaalan adoon mitihid ee waxaa tahay wiilkayga oo xor ah, halkaasi ayuu cantara ku hantiyay xoriyaddiisii waxuuna ka qeyb galay dagaalkii isagoona muujiyay wacdaro una babac dhigay qabiilkii sooduulay gabi ahaantiisba,

Cantara maalinkaa kadib waxuu noqday geesi xor ah oo lagu tashto dagaaladana hormuud kanoqda, waxaa intaasi usii dheer Cantara waxuu ahaa Gabyaa afmaal ah oo Illaa iyo maanta lagu tiriyo totobada nin ee ugu gabayga fiican ee Carabta soomara,

Sidaasi awgeed waxuu had iyo jeer tirin jiray gabayo uuku amaanayo Cablo iyo kuwo uu ku muujinayo Jeceelkiisa iyo heerkuu la egyahay,

Waxaana kamid ah sadaradaan,

SHEEKO IYO SHAAHID

واحب اسقيك لو غير تملق

والله من سقم اصابك من د مي

"*Waxaan jeclaan lahaa in dhiigayga lagaa waraabiyo Cablooy si hagar la,aan ah adiga oo lagaaga daweeynayo xanuun ku asiibay",*

Waxaa sidoo kale hadaliisa caanka ka mid ahaa,

ايا عبله لو كان الخيا ل يزورني

علي كل يوم مرة لكفاني

لئن غبت عن عيني يابنت مالك

فشخصك عند ي ظا هر لعيان

Cablooy hadaa tahay mid isoo booqato iyadoo khayaali ah (Macnaha Humaagaag been ah)Maalin walba halmar way igu filnaan lahayd,

Haddaa tahay mid agtayda kamaqan Ina Boqoreey waxaa hortayda ka muuqda muuqaalkaaga oo caadi ah,

Muddo Dheer kadib ayuu Cantara damcay inuu Cabla kadoono adeerkeeda markuu utagayse waxuu kala kulmay Jawaabo diidmo iyo Ku gacan seyrid ay ka muuqato isagoo shuruud looga dhigay inuu keeno 1000 neef oo geel ah qaas ahaana uuka keeno cumaan,

Cantara oo shuruuddaasi fulinteeda u galay dagaalo badan iyo dhibaatooyin ayaa ku guuleeystay inuu soo

SHEEKO IYO SHAAHID

safo geelii, Balse Oday Maalik intaasi kuma qancin oo way ku adkeyd inuu gabdhiisa siiyo nin Madaw ah oo ay hooyadii Xabashi tahay, sidaasi darteed waxuu utagay ree Binu Fursaan waxuuna usheegay in haddii ay Cantara Madaxiisa oo go'an ukeenaan uu siini doono gabadhiisa, iyagana way ka aqbaleen,

Balse waxaa arintaasi Been yiri Cantara oo gabi ahaanbo ka guuleystay qabiilkii loosoo adeegsaday isagoo xeeladihiisa dagaal uga qaalib noqday,

Cantara ayaa lasheegaa inuu ugu danbeyn guursaday Cablo oo iyadana jecleyd waxaana loo sameeyey aroos cajiib ah oo lagu soo bandhigay dhaqamada Carabta ee waagaasi jiray,

Waxyaabaha laga faa'idaysan karo sheekada

1) In jeceylku ahaa mid soo jiray abid
2) In uusan jecelku laheyn midib kala sooc iyo jinsi fuquuq
3) In umad waliba leedahay dhaqan ugaar ah oo ay isku guursadaan

SHEEKO IYO SHAAHID

SOOMAALIDII HORE (SHEEKO)

Soomaalidii hore waxay ahaayeen dad isku diin ah isku dhaqan ah isku af ah, haddana waxay badankooda ahaayeen ree Miyi, Soomaalida waayadaasi nooleed waxay ahaayeen dad ka maran Ilbaxnimada siyaasadeed ee waagaasi jirtay iyo tan maantaba, Sidoo kale waxay ahaayeen dad dhaqaalahooda uu ku xirnaa xoolaha nool oo kaliya, mana aysan heysan awood dhaqaalle iyo mid ciidan mana lagu fikirayn inay kahor imaani karaan doladaha gumeysiga oo awood lahaa,sidaasi awgeed malaheen dad isku xiran awood ahaan iyo isgaarsiin ahaanba marka laga reebo shaqsiyaad iyagoo aanan heyn wax awood ah iskood u qaansheeystay inay gumeysiga diidaan oo ay kahor yimaadaan, waxaana ka mid ahaa shaqsiyaadkaasi **Axmed Gurey, Siyad Maxamed Cabdille Xassan iyo 11kii dhalinyaro ee lamagac baxday SYL(Somali Youth League).**

Soomaalidaa xaaladaas adag kusugneyd waxay ka sinaayeen midnimo jeceylka, Wadaninimada iyo iyagoo aan marnaba raali kanoqon in Soomaaliya lakala qoqobo ama lakala qeybiyo waxuuna Hadafkooda ahaa midnimada shanta Soomaali oo uu gumeystuhu ukala qeybiyay Soomaali weyn oo dhan ,

SHEEKO IYO SHAAHID

Faa'iidooyinka sheekada

1) Soomaalida hore inay aheeyeen dad jecel midnimada
2) Inay u diyaarsanaayeen iska caabinta awood walbo oo si gardara ah usoo hunjoonta ayna ahaayeen dad ka dhiidhiya hadafkooda
3) Inaysan taakulo iyo caawin udoonan jirin dowladaha kale oo ay iyagu isku filnaani

SOOMAALIDA MAANTA (SHAAHID)

Soomaalida maanta waa un faracii ama Warasadii Soomaalidii hore ee gumeystaha ladagaali jirtay, kana dhiidhin jirtay dhib walbo uu layimaado awood kasta halahaadee, waxay sidoo kale Soomaalida maanta kala simanyihiin Soomaalidii hore magaca balse waxaa shanlaab tiro badan Soomaalida maanta joogta,waxaa sidoo kale ay leeyihiin Soomaalida maanta joogtaa dhaqaalo kabadan dhaqaalihii awoowyaashood iyo waliba aqoon iyo ilbaxnimo kabadan tan ay waayadaasi lahaayeen dadkaasi,

Soomaalida maanta waxay fursado kala duwan uhaystaan wax barashada, Shaqada iyo kamid noqoshada Siyaasada caalamiga, laakiin waxa kaliya laga la'yahay waa tayo,

SHEEKO IYO SHAAHID

Soomaalidaan maanta jirtaa ee fursadahaasi kala duwan heysata waa kuwa kamaran wadaniyadda, iyo midnimo jeceylka waana kuwa waqti ku bixiya iyo hanta qabyaaladda iyo iskala qeybinta,

Soomaalida maanta waa kuwo aan ku baraarugsaneyn wacyiga rasmiga ah ee jira waana kuwa aanan iska illaalin Karin oo unugul dabinada gumeystuhu ama gumeysi kalkaalka uqoolayo,

SoomaIida maanta waa kuwa dhiiggooda ku daadiyo afkaar qabiil, mid Diin oo wadiiqadii saxa aheyd laga weeciyay iyo mid siyaasadeed oo loogu adeegayo shaqsiyaad dana gaar ah wata,

Soomaalida maanta jirtaa waa kuwa wax bartay oo aqoonyahano ah balse aqoontooda u adeegsada dhanka xun ee aan horumarka ahayn marka laga reebo in yar oo u adeegsada aqoontoodo danahooda gaarka ah. Soomaalida maanta waa kuwa qarxiya oo baabi'iya shacabka iyagoona ku qubeysta dhiiggooda,

Faa'iidooyika Sheekada

1) In Soomaalida maanta ay midnimada ogoleen iyadoonan la aqoon sababta
2) In Soomaalida maanta aysan ka faa'iidaysaneyn fursadahooda

SHEEKO IYO SHAAHID

3) In Soomaalida maanta ay ku mashquulsan yihiin isdhibaateyn iyo is dibindaabyeeyn iyaga dhaxdooda ah
4) Inay ka hanti badan yihiin kuwii hore, katiro badan yihin ka ilbaxsan yihiin kana aqoon badan yihiin kuwii hore laakiinse ay ka tayo yaryihiin,

KILIYOBATRA IYO MARK ANTONY (SHEEKO)

Qurux iyo hanaan qof walbo uu jecleysan karo ayay lahayd Boqoradii Masaarida udhalatay ee Kiliyobatra, Waxay ahayd qof heli karta wax walbo ay ubaahato sidoo kalene waxay aheyd qof hanan karta qof walbo ay ubaahato laakiin waxay dooratay Jeneraalkii Romanka ahaa Mark Antony,Generaalku waxuu ahaa shaqsi aanan marna looga shakin Karin inay jeclaanayso boqorada balse waxuu noqday nin ay si xad dhaaf ah ujeclaatay oo ay nafteeeda dhan u hibeysay,

Marka laga tago Jeceylka kadhaxeeyey labadaan shaqsi waxay dhib badan umareen is helidooda,waxayna ugaleen dagaalo iyo rafaad fara badan.

Kiliyobatra iyo Mark oo kasoo jeedey laba xukuumad oo uu dagaal adag ka dhaxeeyo ayaa ugu danbeyn ay usuuro gashay inay kulmaan,

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxayna ku go,aansadaan meeshaasi inay nolosha ka faaruqaan oo ay hal goob ku dhintaan maadaama aysan heysan meel ay kunoqdaan,

Cleopatra nolol iyo raaxo way heysatay lkn waxay u dhimatay iyadoo raadinaysa Jeceyl.

JECEYLKII JECEYLKA GALAAFTAY (SHAAHID)

Marwan waxuu ahaa wiil danleey ah oo kunool degmada Afmadow, Waxuu si dhib ah ku dhiganaayay Iskuul ay Jaaliyadi si mutadawacnimo ah u qarash gareeyso oo kuyaalay degmadaasi,

Marwan waxuu kasoo jeedey qoys aad u tabaalaysan oo xitaa ay ku adkeed inay soo saartaan nolol maalmeedkooda,

Wiilkan oo ah ina Xaashi Dheere oo sida malahayga mootanaaa in ku dhow 15 Sano waqtigaa, ayaa waxaa Aabihii galaaftay dagaaladii sokeeye ee dalka guud ahaanbo asqeeyey,

Marwaan Xaashi iyo labo gabdhood oo ladhalatay waxaa soo barbaarisay oo kusoo dadaashay hooyadood Sacdiyo, oo biilkooda kasoo saari jirtay qoryaha lashito oo inta ay dhabarkeeda kusoo xambaarto suuqa u iib geyn jirtay,

SHEEKO IYO SHAAHID

Balse Marwan ayaa markii uu barbaar noqday hooyadii ka nasiyay shaqadii waxuuna bilaabay inuu isaga wax soo saarto, isagoona wareejin jiray sigaarka, magaaladana kanoqday Jeeble sigaarka iibiya oo caan ah,

Marwaan Galinka Hore waa arday wax barta, galinka danbana waa nin shaqeysta oo reerkooda biilka usoo dhiciya, Wiilkan oo dabiiciyan ahaa nin nadaafada shaqsiyadeed ku fiican hadana waxaa intaasi usiii dheereed xarago iyo labis oo uu isagoo duruufaysan uu ku dadaali jiray inuu is qurxiyo,

Horaa waxaa loo yiri mabaadiida aduunyadu ku dhisan tahay waxaa qeyb ka ah, jeceylka oo ah inaad wax jeclaato ama lagu jeclaado,

Jeceylka oo aanan faqiir iyo taajir aqoon ayaa hadba waxuu ku dhacaa qof walbo oo aanan waayo aragnimo fog u laheyn, qof walba oo niyadiisa raacsiiya qof uu markaasi ubogay, naftiisana ka dhaadhiciya inuu heli karo qofka uu calmaday,

Marwan waxaa waligiis hoosta ka jecleyd Salmo oo uu dhalay abtigiis laxmiya taasoo dumarnimo awgeed awoodi waysay inay jeceylkeeda u bandhigto wiilkan qalbigeeda ka sameystay hoyga, waa Marwaane, Salmo waxay had iyo jeer ku hamisaa inay mar uun jecelkeeda usheegato,

SHEEKO IYO SHAAHID

qorsho walbo oo ay habeenkii dejisana subaxdii wuu ka fashalmaa oo waliba markii uu marwaan hor yimaado waxay iska dhigtaa qofaan jecleyn oo waxayba laqaloocisaa hadalka iyo kaftankaba,

Isagana jecelkeeda ay habeenkii la ilmeeyso ma dareensano, waxuuna qalbigiisa kusii jeedaa Muno oo ay isku Fasal dhiganayeen balse aheyd gabar beesaani ah oo inta badan lagu xanto gaanjibanimo qoto dheer,

Muna waa gabadh qurux udhalatay oo Illaahay siiyay hanaan midibkeeduna waxuu ahaa Maariin, waxayna aheyd gabar isla weyn oo aan inaba udabcin ragga balse casharo lama ilaawaan ah udhigta halka ay iyada god ku dhici laheyd,

Gabadhaan oo kudhalatay kuna soo indha kala qaaday Gaarisa ayaa ah shaqsi ku xeel dheer sida ragga dabinada loogu qoolo loona soo af Jaro Sheeko Baraalayda dhalinta ee ku dhisan Xiiso iyo kahelid waqi kooban ah,

Waxay Muno hore u sahayatay Maslax , Siyaad dhicis iyo Daadir yare oo inta ay isku soo daadiyeen kadheefay guul daro, waliba kudarsoo waxay dhamaan wiilashaasi kasoo jeedeen qoysas ladan oo ay sareedadu guryahooda ceegaagtay,

Marwan waxuu inantaan ku haminaayay muddo dheer balse xiriirka kaliya ee uu la sameeyey gabadhan ayaa ah

inuu ula tacaamulo si caadi ah, qalimaanta iyo walxaha yar yarna ay kala qaataan,

Marwan in uusan Muno usheegin arimahiisa Jeceylka waxaa usabab ah laba qodob oo uu runtii xal uwaayay,

Waa midoo waxuu goob joog ka ahaa Muno oo dhagaha ulaabtay akhiyaar si kafiirsasho la'aan ah ugu soo dhacay,

Mida labaadna waa inuu kasoo jeedo qoys faqri ah oo waxuu isleeyahay hadaad u mohato gabadhan armay ceebi kaa raacdaa, sidaasi darteedna waxuu go'aansaday inuu arimahiisa qarsado uusanna soo dhaafin xeyndaabkaasi isla tacaamulka,

Iyadu waa dumaroo dareen kama dhamaadee waxay bixin weysay Marwan iyo waxuu kadamacsanyahay, maadaama uu inta badan ka saacido waxii ay ubaahato, waxaana ugu cajiibsaneed markii uu si hagar la,aan walaalkeed oo xanuunsan ugu deeqay dhiiggiisa,

Arimahan la xiriira isku soo dhawaanshahooda waxaa aad oga xumaaday Maslax oo ah inanka kaliyee uu dhalay Guddoomiyahii degmada ee waqtigaasi,

waxaana kalifay inuu ka xumaado ama uu xasdo,

Kow inuu horey ugu guuldareystay inuu xiriir layeesho Muno oo uu aad ujeclaa iyo qodobka labaad oo ah in isagoo aaminsanaa inay sharaf darro kutahay in gabadhii isaga diiday ay jeceyl lawadaagto wiil faqiir ah,

SHEEKO IYO SHAAHID

Sikastaba ha ahaatee Maslax marna ma'uusan heyn qorsho uu Marwaan ku ceebeysan karo ama uga hor istaagi karo xiriirkan ka dhaxeeya labadaan shaqsi, Lax dhukan waxaa la yiri col iyo abaar mooge Maslax ma uusan ogeen waxa labadaan qof kadhaxeeya inuu yahay xiriir caadiya ee waxuu uheystay inuu un yahay Jeceyl qoto dheeraaday,

Balse saaxiib xun saaxib xun mawaayee, waxaa Maslax u xogwaramay siyaad Dhicis oo isagana ahaa dadka kusoo hungoobay arimaha inantaan, Waxuuna ku yiri mar ay arimaha Muno kahadlayeen, ''Maslaxow labadan qof jeceyl kama dhaxeyeyo ee wax kadhaxeeyaa waa un xiriir caadiya'', waxuuna intaa kusii daray inuusan aaminsaneyn in Muno arimo jeceyl laga dhaadhicin karo marwaana uu ku fashilmi lahaa hadduu ula tagi lahaa jeceyl iyo waxii lamid ah,

Maslax oo ay meeshaasi wax uga bidhaameen ayaa yiri, Saaxiib kawaran hadaan warqad iyada uqorno inagoo iska dhigeena Marwaan, Siyaad ayaa yiri waa Ra'yi fiican hadday warqadaasi aragto Muno ayaan aqoon uleeyahaye waxay ku dhigaysaa ceeb uusan marnaba ka soo waaqsan Karin,

Labadooduba in Laqdabadaasi lasameeyo ayaa la isku af gartay waxaana la is yiri '' Hawraarsan iyo Hawraarsan''

SHEEKO IYO SHAAHID

Warqaddii ayaa la qoray iyagoo iska dhigaya Marwan waxaana loo dhax galiyay Buuggeeda Seyniska Xili ay bareeg ku maqneed, Muno buuggii ma aysan feedin maalintaas Maadaama uu Macalinkoodii Seyniska Maqnaa, maalin seddexaad ayay Muno warqada aragtay iyadoona dabcan hadalada qaar qoonsatay,waxayna si deg deg ah u wacday taleefankiisa waxayna ku balamisay beeraha Adablaha oo runtii ahaa dhul agan ah oo uu coosku is wada qabsaday, sidoo kale waxay Muno maalintaas usoo labisatay si qurux badan oo soo jiidasho leh,

Marwaan dhankiisa wuusoo ajiibay balanta laakiin si ula kac ah ayuu uga soo dib dhacay Maxaa yeeley waxuu cabsi ka qabay in Muno ay u caraysantahay uuna ku dheedheeraaday arimaheeda ayna ku dhihi rabto nagu kala kaxee, sidaasi awgeed waxaa uu sii diyaarsaday jawaabihii uu ugu jawaabi lahaa haddii ay su,aalo weerar ah latimaado,

Laakiin sidaasi wax uma jiraan warku waaka gadisanyahay, waxayna Muna kayara caraysantahay dib udhicidda uu balanta dib uga soo dhacay bes,

Marwan ayaa goobta yimid iyadoo ay Muno kasoo horeysay 15 daqiiqo, Waxayna isla markiiba kula dul kuftay canaan oo ay ku canaanayso inuu Qeyrul Masuul yahay oo uusan balamaha ilaalin Karin, Marwaan oo

shaki hore qabay ayaa lasoo booday, warkaasi waalaguu dhamaayee dantaada igala hadal,

Waayahay soo fariiso halkan ayay kutiri, oo sabab ayuu lasoo booday,

Waxay ku tiri fariiso sheekadeena taagni laguma dhameyn karee, waayahay ayuu yiri wuuna fariistay,

Muno ayaa hadalka bilaabatay, waxayna tiri, sidatan

‘‘Aboowe Marwan soo dhawaaw marka hore, aniga Muno ah waxaan runtii soo arkay wiilal badan, oo badankooda isoo damaaciyay, waxayna dhamaan iila yimaadeen xiriir inaan la sameeyo, waxaanse dhamaantooda kawaayay qof aan aamino,

Marwan ayaa lasoo booday, al xaasil inaan kudaayo saw marabtid

War sug ayay kutiri,

Maanta waa Illaahay mahaddii, Warqadaada waxaad kusoo qortay hadalo aan dhibsaday,

Warqaddee? Ayuu lasoo booday Marwan,

Laakiinse Muno ayaa afka gacanta kasaartay oo kutiri aan dhamaysto sheekadaa hakuu danbeeysee,

Waayahay dhameeyso warkaaga ayuu ugu jawaabay,

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxay tiri waxaan kaxumaaday inaad idhahdo sigaarkaa ila wareejinee oo jeeble ayaan isla noqoneenaa, waxaan kaloon ka xumaaday inaad dadkeena kutilmaamtay dad kibran,

Laakiin waxaan waxaasi oo dhan ku Ilaaway ereygaaga macaan ee aad gadaal warqadda uga soo qortay ee ahaa ‘’Jeceylka’’

Marwan doqon ayaa tahay gabar ayaad warqad uqoraysaa markaas ayaad Buug kasoo jeexanaysaa waraaq, waliba iyadoo aan bakhshad kujirin ayaad iisoo dhiibaysaa, kaliya waxaan kaheley fariinta jeceyl ee ay warqadaada sidday, ma ogiyee warqadaada ma quruxsaneen, Jeceylka sida loo sheektana mataqaanid, Hadalkaagana wuu ad adag yahay,

Marwan oo yaaban ayaa yiri, Mafahmin waxaa kahadleyso, anigana waraaq kuuma soo dirin,

Muno ayaa intay qososhay ku tiri warqadaada xitaa sidan aad uhadleysay ayaa waxaa ku qornaa hadalo adag, ee lasoco inaan kujeclahay inta aad ijeceshahay in kabadan,

Marwan oo garan la waxuu ku hadlo ayaa yiri, waanku jeclahay waa run laakiin warqad kuuma soo qorin,

waayahay marba hadaad ijeceshahay warqaddana adigaa soo qoray ayay ku hadaaqday ee naga kaxee meeshan gabalka wuu dhacayaa adigaana waqtiga naga dilaye oo

balanta kasoo daahey, Waa la isa soo raacay iyadoo ay Muno kaliya darooryameyso oo ay sheeganeeyso inay aad u faraxsantahay ayna tahay jecelkeedii ugu horeeyey,

Magaalada ayaa lagu kala leexday waxaana jimcahii lagu balamay gurigii Muno,

Marwan isaga dhankiisa waxbaa ku cakiran qoftii uurabay wuu heley, haddana shaki waxaa kujira ah armay dabin kula rabtaa, oo boqolkiiba boqol isma dhiibin,

Inta Jimcaha laga gaarayo waxaa la iska wacaye taleefanka gacanta waxuuna Marwan codsaday in warqadda latusiyo,

Waxay Ree Banaadir Ku maahmaahaan ‘’Talaado Iyidaaba kooyaase’’ oo Macnaheedu yahay talaado iyadaa iman doonta,

Jimcahii ayaa lagaaray waxaana Marwan lagusoo dhaweeyey Qasrigii Xaaji Yuusuf oo ahaa Muno Aabaheed, Muno oo aheyd gabar Fariid ah ayaa waalidkeeda mar hore ku wargalisay arimaha Marwan iyo waxa ka dhaxeeyo labadooda waxayna sidoo kale usheegtay waalidkeeda inuu Marwan yahay wiilkii dhiiga ushubi jiray Nuur Xaaji Yuusuf oo ahaa walaalkeed, Waalidkii Muno oo ahaa dad aad u wanaagsan oo ahlu kheyr ah ayaa ku farxay in gabadhoodu xulato dookheeda, waxayna runtii ladhaceen markii looga

SHEEKO IYO SHAAHID

sheekeyey Marwan inuu yahay nin dan yar ah oo aan balwad aqoon, kana fikira danahiisa gaarka ah oo kaliya,

Marwan ayaa guriga yimid Soo dhoweyn iyo isa salaamid iyo is xog wareysi gaaban kadib waxuu Xaaji Yuusuf Marwan ku wargaliyay inuu gabadhiisa kudarayo balse ay qasab tahay inuu ehelkiisa keeno marka hore si arimahaasi ay uga wada xaajoodaan waxuuna sidoo kale usheegay inuu masuul uga dhigayo Carwo lagu iibiyo dharka oo uu odaygu lahaa,

Isla Sabtidii waxuu Marwan layimid eheladiisa waxaana la isagu daray Siismo, Meher iyo Aroos,

Arooska oo udhacay hab uusan Marwan waligiis ku fikirin inuu u aroosan doono ayaa noqday kii ugu qarashka badnaa ee deegankaasi kadhaca waxaana halkaasi mar labaad jabkii ugu weynaa kala hoyday Maslax iyo saaxiibkii Siyaad oo dabcan khayaanadii la gadoontay waxayna Marwan utareen wax aan ku tilmaami karno ‘’Isbadal Nololeed oo dhab ah’’ halka ay lugooyada lamaaganayeen,

Habeenkii aqal galka oo dabcan farxad iyo reyn reyn u aheyd Marwan ayaa aroortii waxuu ku waabariistay Murago kadib markii loosoo sheegay in gabadhii abtigiis uu dhalay ee aheyd Salmo in ay dhimatay xalay loona soo toosay iyadoo meed ah aroortii,

SHEEKO IYO SHAAHID

Marwan oo ilintu ay gobo'leyneyso ayaa gurigii abtigiis tagay waxuuna dul galoodsaday meedkii Salmo isagoo Ilintu ay qulquleyso, waxaana isla markii loo dareerey aaskii gabadha oo waxaa lagu aasay duleedka magaalada qabriyo kuyaalay,

Markii laga soo noqday aaska ayaa Salmo hooyadeed uyeertay Marwan waxayna udhiibtay Warqad ay ka heshaey Barkinta Salmo subaxdii waxay usheegtay inay Marwan ku socota,

Marwan oo Warqadii sitta ayaa gurigiisa cusbaa kusoo noqday waxuuna fariistay qolka fadhiga si uu warqada u aqriyo,

Warqada Salmo ayaa u qorneed sidatan,

Ka: Qof ku guuldareeysatay Nolosha

Ku: Qofka aan dartiis nafta u nacay

Marka hore waan ogahay inaad ka xumaan doonto Falkaan aan sameeyey, laakiin silica jeceyl waxaa iidhaama dhimasho,

Marwan hadaan ogaan lahaa qarsashada jeceylkeeyga inay geeri idhaxalsiin doonto waxaan habeen iyo maalinba kuusheegan lahaa jecelkeyga, waxaanse iska dhaadhiciyay inaad mar un ifahmi doonto,

SHEEKO IYO SHAAHID

Aboowe aniga waxaan suntan u cabay waa jecelkaaga, laakiin kama xumi dhimashadeeyda waayo adiga waxaad gaartay hadafkaagii ugu muhiimsanaa nolosha taas ayaana Farxad ii ah,

Aboowe markay hooyo maqasho dhimashadayda waxay tuuri doonta dharka oo way waalan doontaa, Laakiin Aabo waa nin calool adag waxuuna markiiba isku sabarsiin doonaa inaan doqon ahay teydana ay soo gashay, waxaan kaala dardaarmayaa inaad hooyaday ii ogaato,

Marwan Laftaada wax badan baad ka shaleyn doontaa waayo adigaba doqon ayaa tahay maxaa yeeley waxaad aqrisan weyday qalbiga walaashaa oo dunida kuugu jecel oo hadana kugu soo ag kortay,

Waxaan adiga iyo Muno idinkugu hambalyeynayaa arooskiina, waxaana idinka codsanayaa inaad igu samisaan gabadhiina, hadduu Eebe idin siiyo, waxaan kaloon idinka codsanayaa inaad iisoo duceysaan,

Salma Saalax...

Ilove you..

Murugta iyo caloolyowga ay Marwan arintaani ukeentay ayaa noqotay mid aanan waligiis qalbigiisa ka bi’in,

Geerida Salmo hadda waxaa laga jooga sedex sano Marwan iyo Munana waxaa ay uguureen Magaalo kale

waxayna isku dhaleen labo ciyaal, Waa wiil iyo gabadh, Wiilka ayaa curud ah waana Salman iyo Gabadha oo ah curud ku xigeen magaceedana waa, Salmo.

HORUMARKII JIRAY XIlLLIYADII HORE (SHEEKOOYINKA QUR'AANKA)

Nabi Suleymaan CW oo ahaa wiilkii Nabi Daa'uud ayaa waxuu Eebe weyne ku manaystay boqortooyo ay udeegaan Dadka,Duunyada, Jinka iyo Dabaylaha,

Boqortooyadani ayaa sida uu Illaah quraanka noogu sheegey waxay adeegsaneysay Ilbaxnimo aanan maanta oolin ama qaarkeed aanan lagu riyoon Karin xitaa, Wax kamid ah,

Injineerada caalamka maanta ku nool waxaa loogu jecel yahay kuwa guri quraarad ah biyo dushooda ka dhisa aad ayaana loo buunbuuniya haddii ay dhacdo, laakiin xiligaasi Nabi Suleymaan CW waxay aheyd wax iska caadiya oo mudo yar oo uu qof safar kusoo jira lagu sameeyo,

Gurigii uu nabi suleymaan deganaa ee lagu soo dhaweynayay Bilqiis waxa uu uu kasameysnaa quraarad ay biyo hoos qulqulayaan taasoo qofka socda uusan kala

saari Karin biyaha iyo quraarada, sida uu Illaah Quraankiisa kariimka ah noogu sheegay.

قِيلَ لَهَا ادْخُلِي الصَّرْحَ فَلَمَّا رَأَتْهُ حَسِبَتْهُ لُجَّةً وَكَشَفَتْ عَن سَاقَيْهَا قَالَ إِنَّهُ صَرْحٌ مُّمَرَّدٌ مِّن قَوَارِيرَ قَالَتْ رَبِّ إِنِّي ظَلَمْتُ نَفْسِي وَأَسْلَمْتُ مَعَ سُلَيْمَانَ لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ

(Waxaa lagu yiri gal qasriga markii ay aragtay waxay mooday biyo mool ah waxayna feeday lugaheedii, Waxaa lagu yiri waa dhismo laga sameeyey quraarad, waxay tiri rabigaygoow waxaan dulmiyay nafteeyda waxaan la Rumeeyey Nabi Suleymaan Allaha Caalamka oodhan Rabigood) Aayada 44 aad Suuratul Al-Namal,

Sidoo kale siduu Eebe weyne Qur'ankiisa noogu sheegay isla Suuradaas dhexdeeda in Nabi Suleymaan CS uu adeegayaashiisa uu weydiiyay, ''kumaa awooda inuu iikeeno carshiga Balqiis kahor inta aysan imaan iyadoo Muslim ah,

قَالَ عِفْرِيتٌ مِنَ الْجِنِّ أَنَا آتِيكَ بِهِ قَبْلَ أَنْ تَقُومَ مِنْ مَقَامِكَ وَإِنِّي عَلَيْهِ لَقَوِيٌّ أَمِين

(Cirfiid Jinka kamid ah ayaa yiri aniga ayaa kuu keenaya inta aadan meesha kakicin arintaasi iyada ahna waxaan ahay mid awood uleh oo aamina) Aayada 39 aad Suuratul Al-Namal

SHEEKO IYO SHAAHID

Laakiin mid uu Illaahay kusheegay inuu cilmi kusaabsan Kutubta yaqiinay ayaa yiri anigaa kuugu keenaya Ilbiriqsi.

قَالَ الَّذِي عِندَهُ عِلْمٌ مِّنَ الْكِتَابِ أَنَا آتِيكَ بِهِ قَبْلَ أَن يَرْتَدَّ إِلَيْكَ طَرْفُكَ فَلَمَّا رَآهُ مُسْتَقِرًّا عِندَهُ قَالَ هَذَا مِن فَضْلِ رَبِّي لِيَبْلُوَنِي أَأَشْكُرُ أَمْ أَكْفُرُ وَمَن شَكَرَ فَإِنَّمَا يَشْكُرُ لِنَفْسِهِ وَمَن كَفَرَ فَإِنَّ رَبِّي غَنِيٌّ كَرِيمٌ

(Waxuu yiri mid agtiisa ahaa cilmi Kitaabka ka ahaaday aniga ayaa kuu keenaya inta aadan ishaada soo celin, markii uu nabi Suleymaan arkay carshigii oo agtiisa yaala waxuu yiri kani waa fadli iyo dheeraad ka ahaaday Rabigay dhankiis si uu iigu imtixaano inaan kushukrinayo iyo inkale,Ruuxii Illaah kushugriyo ma'uusan u shugrin illaa naftiisa mooyaane, Ruuxii illaah fadliguu siiyay ku kufriyana Rabigay waa Qani oo wax bixin badan) Aayada 40 aad ee suuratul Al-Namal

Maxaa meeshaasi inooga cad akhristoow? Bal ufiirso,

Cirfiidkii jinka ahaa waxaa ka fiicnaaday oo waxqabadkiisa ka deg deg badnaaday mid aanan Jin aheyn balse Illaah noo sheegay inuu cilmi kitaabka quseeyo wax ka yaqiinay, Cilmiga Kitaabka muusan wada aqoon ee waxbuu ka yaqiinay, sidoo kale ninkaasi Jinka kaliya kama qatarsaneyn sidoo kale waxuu ka qatarsan yahay culimada seynisyahada ah ee hadda nool,

SHEEKO IYO SHAAHID

Maxaa yeeley Tiknoolijiyadda casriga ah magaarin heer ay kursi yaala masaafo la'eg boqolaal meyl ama kumanaan meyl inta soo qaaddo ilbiriqsi ku keento, Mana awooddo.

Sidaasi awgeed Tiknoolijiyadda hadda jirtaa anaga ayay horumar nala tahaye ma'eysan gaarin heerkii laga gaaray xiliyadaa aan sheegay,

Waayo anaga ma awoodno inaan tagno cirifka ugu shisheeya ee aduunyada anaga oo heli karna sabab ama shey noo fududeeya inaan gaarno cirifkaasi sida Dul Qarneynba Illaah usiiyay sabab uu ku gaaro meeshuu doono, Waxaa kaloon wada ogsoonahay in Dul Qarneyn dhisay Darbi lagu xeyndaabay **JUUJ WA MAAJUUJ**, darbigaas oo laga sameeyey biro ladhalaaliyay loona dhaxaysiiy laba buur oo dheer dheer, Injineerada maanta kuma sahlana inay dhisaan darbigaasi xajmiga leh ee laga sameeyey bir la dhalaaliyay,

Taas waa sababta mar walbo ay culumada cilmi barista ku hawlan u helaan waxyaabo ka fajiciya ama ka yaabiya,

Waxyaabaha Sheekadan laga Faa'iideeysan karo

1) Waxaa laga faa'iidaysan karaa in ilbixnamidii horey ujirtay kaweyneed taan maanta aan ladhacsanahay.
2) Waxaa kaloo laga faa'iidaysan karaa sheekadan in cilmiga heerka laga gaaray xiliyadii hore aanan hadda laga gaarin amaba loo dhaweyn.

3) Waxaa kaloo laga faa'iidaysan karaa in Insiga kahor mari karo kana qatarsanaani karo jinka haddii uu cilmiga barto,
4) Waxaa kaloo laga faa'iidaysani karaa in Cilmigu wax walba ka qiimo badan yahay horumarkana uu isaga kujiro.

HORUMARKA HADDA JIRA(SHAAHID)

Waxaanu ogsoonahay in maanta heer sare laga gaaray Tiknoolijiyadda taasoo kaliftay in aduunyada aynu konoolnahay la isaga warqabo sida hal tuulo kale,

Waxaanu usoo joognay oo aanu aragnay isbadalada iyo horumarka laga gaarayo gaadiidka iyo casriyeeyntiisa, boqolaal sano kahor waxaa gaadiid aduunyadi dhami u ahaa xoolaha nool,

Nicolas Joseph Cugnot ayaa waxuu sameeyey gaadiidkii ugu horeeyey ee leh afar taayar kuna shaqeeyo tamar,

Sidoo kale sanadka markuu ahaa 1808 kii ninka lagu magacaabo Francois Isaac De Rivas ayaa Naqshadeeyey gaarigii ugu horeeyey kaasoo leh matoor gudaha ah oo shidmaya kuna shaqeeya shidaal iyo haydarajiin ama Biyo,

Gaadiidkaasi oo isbadalo badan soo maray ayaa waxaa looga soo talaabay in lagu fikiro sameynta diyaaradaha samada ceegaaga, Waxaa iyadana 1905 soo saaray

diyaaradii ugu horeeysey si guul kujirta loo raaco labadii nine e walaalaha ahaa Orville Wright iyo Wilbur Wright oo tixraacay fikirkii iyo aragtidii Seynisyahanka caanka ah Goarge Cayley,

Gaadiidkaasi aan soo sheegnay iyo kuwa hadda kadiba soo bixi doono ayaa lagu sheegay diinteena iyadoo uu Illaah Qur'aankiisa noogu sheegey suuratul Al-Naxl, in Illaah noo abuuray Kheylka, Baqasha iyo Dameerada si aan u korno iyo qurux, markaasi ayuu Illaah sii raaciyay waxaan kaloon idiin abuuri doonaa waxaydan aqoon,

وَالْخَيْلَ وَالْبِغَالَ وَالْحَمِيرَ لِتَرْكَبُوهَا وَزِينَةً ۚ وَيَخْلُقُ مَا لَا تَعْلَمُونَ

(Kheysha, Baqasha iyo Dameerada ayaan idiin abuurnay si aad ukortaan iyo qurux waxaana idiin soo saari doonaa waxaydan aqoon) Aayada 8aad ee Suuratul Al-Naxl

Aqristoow adigaan kuweydiiyay waxa la raaci karo oo ay xiliga aayadu soo dagaysay eeysan garan Karin Nabi Maxamed ﷺ iyo Asxaabtiisa waa maxay?

Aankuu sheegee Waa Gawaarida, Diyaaradaha, Maraakiibta iyo gaadiid walbo oo casriya oo hadda jooga iyo kuwa hadda kadib soo bixi doona,

SHEEKO IYO SHAAHID

Kadib waxaa labartay in lasoo saaro isgaarsiinta noocyadeeda kala gedisan illaa lasoo gaarsiiyo heer inuu qof walbo gacanta ku sito aaladiisa isgaarsiineed,

Sidoo kal.e waxaa soo baxay Muuq Baahiyayaal iyo Raadiyayaal, laakiin Malahayga illama aha in horumarkeena uu gaarsiisanyahay kuwaa xliyadii Nabi Suleymaan iyo Du Qarneyn jiray, Waxaan hadda awoodnaa inaan Ilbiriqsi qof naga fog codkiisa ku maqalnaa, waana horumar lataaban karo laakiin marna ma awoodno inaan Kursi Il biriqsi ku geeynaa Masaafo fog,

Sidoo kale waxaan Awoodnaa inaan maalmo ama bilo safar ahaano anagoo gaadiid saran laakiin ma aynaan gaarin heer aan xili kooban kugaarno cirifyadadda caalamka,

1) Waxaa Sheekadan laga faa'iidaysani karaa in Illaahay Qu'aankiisa noogu sheegay gaadiidka noocyadiisa kala duwan kuwii hore iyo kuwa hadda yaala iyo kuwa imaan doona,
2) Waxaa kaloo laga faa'iideysani karaa in Tiknoolijiyada horumar laga gaaray balse aysan gaarsiisneen tt hore

SHEEKO IYO SHAAHID

XIRIIRKII INSIGA IYO JINKA DHEX MARAY (SHEEKO)

Ma aqaan waxaan sheekadaas kukeenay laakiin cabaar ayaan isku celcelinay dood kusaabsanayd sheekooyinka laxiriira Jinka iyo in si caadiya Xiriir loola sameyn karo iyo inkale,

Cayduruus oo markaasi umuuqday nin fahmaysan ayaa lawareegay sheekada waxuuna noo sheegay inuu mar xiriir lasameeyey gabar jin ahayd oo lagu magacaabi jiray Borqan taasoo kasoo jeeday boqortooyo Jinka lahaa oo iyaga dhaxdooda caan ka ahayd oo lagu Magacaabi jiray Samhures,

Borqan ayaa ahayd ina Ghoul waxaana hooyo u ahayd naag soo saarta dharka jinku xirto soo lagu magacaabi jiray Zawba'a waxayna kasoo guureen Madrid siday iyada sheegtay,

Habkii aan gabadhaan Jinka ah isku baranay waxay ahayd mid layaab leh waayo kuma fikirayn xiriir iyo tacaamul iska daayee inaan jin arki karo,

Waxay ahayd habeen gudcur ah waxaan kasoo baxay guriga anigoo doonanaya kaniin lakiin waxaan silamafilaan ah oga lumey wadadii aan farmashiyaha u aadi jiray anigoona ku dhax lumay xaafad isku raran ah oo ku taalay magaalada,

SHEEKO IYO SHAAHID

Wareer iyo noqnoqosho kadib xitaa waxaan garan waayay dhankaan kasoo galay anigoo quus taagan ayaa waxaan maqlay cod dumar oo oranaya maku caawin karaa,

Si farxad leh ayaan ku iri haa, saa waa gabar dheer oo qoodh ah, way ihor socotay waxayna igu tiri isoo raac ilaa aanka imaano laamigii weynaa ee Bangiga hortiisa maraayay, markaan iftiinka kubaxnay lugta ayay gadaal udhigtay waxayna iishetay inay iftiinka ugudbayn anigana kuma qasbin,

Waxaan damcay inaan umahad celiyo saa way iga sii dheeraatay durbadiiba, waanka daba dhawaaqay waxayna cod dheer igu tiri ‘’anigaa’’?

Markuu sheekada halkaas marinaayo ayaa hal mar qosol loo daaday waxaana afka lala qabsaday fajac iyo yaab, anigase arintaas maanan weyneen oo waxaan kasoo qaaday sheeko xariir, Balse waxaa is heyn waayay oo hadal lasoo booday Abtidoon oo malaha sheekadaa la maqsuuday waxuuna yiri,

‘‘Macalin Fariidi ayaa xalay arimo ceynkaas oo kale ah iiga waramaayay oo iisheegay isaga iyo Jinka inay Mucaamilaan lakiin adigaaba kadaran bal noo faahfaahi sheekadaada,

SHEEKO IYO SHAAHID

Hawraarsan ayuu kujawaabay Cayduruus waxuuna gudo galay sheekadiisii,

Waxuu kubilaabay sheekada sidatan, kadib lumidaydii habeenkii gabadha dib umaanan arag ilaa mudo,

Waxaan iska ahaa arday dhigta iskuulka galabtii ayaanan aadi jiray waxaan sii mari jiray wado dheer waayo Iskuulka cabaar ayuu lahaa,

Galab galbaha kamid ah anigoo Iskuulka isku diyaarinaya balse ku mashquulsan raadinta Buug aan la,aa ayaa waxaa xaafada yimid Juuni Dahab nin lagu naaneysi jiray oo aan daris ahayn isagoo ay farxadi wajigiisa kamuuqata Waxuuna isa salaamid kadib sheeko ubilaabay hooyo oo gambar inta udhigtay koob shaah ah oo dheerna soo ag dhigtay maarkuu laba jeer kabaday qiyaasteyda is bariidintiina idleeyey ayuu gudo galay sheekada ah in uu maanta helay dheeman kaasoo qiimahiisu gaarayo $1,000,000,

Hal Malyan aa!!!.....? ayaan lasoo Booday

Anigoo Illaaway is diyaarintaydii iskuulka niyadaydana ujiheeyey sheekadaan xiisaha leh, ayaa waxaan markale weydiiyay halkee baad kaheshay isgoon jawaabtii hore isiin,

Waxuu Yiri, Waxaan ka helay albaabka laga galo Madxafka qaranka(Notional Musium) waxaana laga

yaabaa buu yiri inuu kamid ahaa alaab Madxafka loo waday,

Intaan qoslay ayaan kula kaftamay adiga waaba u ekeyd nin Luul ama Dahab heli raba waayo magacaagaaba ah Juuni Dahab,

Anigoo niyadaydaba kasaaray Iskuulkii ayay Hooyo igu qeylisay iguna tiri war soco iskuulka aad waqtiga wuukaa dhacay,

Waayahay ayaan iri intaan Boorsadii buuggaagta qolka kala soo qaatay ayaan soo baxay anigoo niyada kuhaya inaan daahsanahay kana lablabaynaya Iskuulka, ogu danbeyna go'aansaday inaan iskuulka kabaaqdo maanta oo aan raadiyo dheeman ileyn Juuni Dahab ayaaba hunguriga iga soo riday,

Waxaan abaaray Xeebta iyadoo gabalkiina uu soo madoobaanayo laakiin dan iyo xaajo kama galin gabalka dhicidiisa sababtoo ah waxaan kafikiraayay waxyaabo qaali ah,

Markaan gaaray xeebta ayaan bilaabay indha indhayn dagdagi kamuuqato labo talaabo kadib waxaan gadaal kamaqlay cod aad umacaan hadaan eegay waaba gabdho totobo ah oo jooga isla eg muuqaalkana isku eg,

Intaan qalqalay ayaan ku iri Walaahi hadaad hal labis xirnaan lahaydeen waxaan uqaadan lahaa hal qof oo

muraayado badan iiga dhax muuqda balse maxaad sidaan isagu egtihiin waa yaabe,

Waxaa jawaab aan layaabay isiisay midkamid ah gabdhihii oo iisheegtay inay mataano yihiin dhamaan ayna usocdaan aroos mataantooda sideedaad oo caawa aqal galaysa,

Sided mataano ah waligeedba lama sheegin ayaan lasoo booday,

iyadoo hadalka sii wadata ayay iweydiisay intay gooni iila baxday adiga maxaa halka kaheysaa?

Sikaftan leh ayaan u iri adigaan ku raadinaayay ee magacaa,

Borqan Ghoul, ayaa la iyiraahdaa

Waligay mamaqal Borqan Ghoul!!!

Ayaan kujawaabay.

waxay igu tiri waligaa ma i aragtay? Maya, Ayaan ugu jawaabay,

Codkaygana mamaqashay waligaa? Intaan cabaar aamusnaaday,

ayaan iri,

Haa iguma Cusba,

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxaan ahay bay tiri inantii habeenkii kutoosinaysay adigoo lunsan, laamigana ku geyn jirtay,,

Haaa magabadhii iftiinka diidaysaybaa, ayaan lasoo booday,

Warkaaasi ka bax ee nakeen xaafadaan ku geyneeynaaye, ayay tiri,

Maya Maya gabalkaa dhacay meeshana waa xeeb ayaan ku andacooday, laakiin la igama aqbalin oo waxaa la igu leexiyay waddo biyaha dusheeda ah oo aan waligay arag,

Waan yaabay, waxaanan ku iri boqranay magaaladaan waanku dhashay wadadaan iyo horumarkaana waligay ma arag, see wax ujiraan,

Halkaan jawaab ka sugaayay ayaaba la igu yiri,

Horta Magaca iska sax, Borqan dheh,

Waayahay ayaan iri, amarkaagaa jiro,

Markaas ayay igu tiri magaaladaan kumaadan dhalan waligaana maadan arag, ee nakaxee,

Waayaahay ayaan iri anigoo kaftan u arkay warkaas, wax yar kadibna waxaan gallay indho darandar iyo jawi cajiib ah,

Saa waa aroos si cajiib ah loosoo agaasimay, layaabkeygi waxuu ahaa markaan arkay dhalinyaro aad umoodo inay kushineeto kusocdan kuwaasi oo adeega gee geenayey,

SHEEKO IYO SHAAHID

Borqan ayaan ku iri ilmahani maxay kusocdaan, intay qososhay bay igu tiri wali wax maadan fahmin ee nakeen hooyo wataa kursiga geeska fadhido aanku soo baree, waayahay nakeen baan iri,

Maamadii ayaan utagnay salaan kadibna waxay iisheegtay inay kufaraxsantahay isbarashadeena ee waa halkee xaafadiina, waxaan ku iri Danwadaag, intay afka qabsatay ayay kutiri naa wiilka maxaad usoo fogeeysay inkaarbaa qabtaaye,

Gabadhii ayaa ku jawaabta hooyo hadaan celinaa, aniga waan yaabanahay shan daqiiqo xitaa ma'aanan soo socon waxaana joognaa magaalo kale oo qurux badan, waxoogaa cunno ah ayaan cunnay waxaanan isa soo raacnay Borqan Ghoul, waxaana nasoo sagoootisay hooyadeed Zawba'a oo oo iidhiibtay bac yar oo ay ku jiraan dhar ay iyadu sameeysay,

Kadibna waxay nooga hartay meel dhexe, Borqan ayaa inta gacanta iga qabatay si dareen leh indhaha iiga eegtay, anigana waan eegey, markaasay igu tiri dabaal waan joognaa xaafadiina ee bax, Allah, sideey ku dhici kartaa ayaan iri, way dhacdaye soco ayay iigu jawaabtay, waayahay ayaan ku iri markaan laba talaabo rogay ayay iga daba timid oo igu tiri, Cayduruus maanta waa kulankeeni ugu danbeeyey,

oo waayo ayaan ku iri?

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxay iigu jawaabtay dhag weynyahaw, waxaan kala nahay labo dad islamana tacaamuli karno,

intaan muusoodey ayaan iri dee dadkoo dhanbaan kala nahay labo dad,

Dhagayso anaga Insi manihin ee haween wacan,

Oo hadaa ma jinbaa tahay, Haa ayay tiri, soo maadan dareemin, Maya lakiin hadaan dareemayaa ayaan ku iri anigoo argagaxsan, Gurigii ayaan tagay habeenkii oo dhan waan argagaxsanaa,

Waaga markuu baryay ayaan is iri bal fiiri dharkii maamada kuusoo dhiibtay, markaan gashaday, saa waa inigiyoo u ordaya sida ciyaalkii kushineetada inay kusocdeen lamoodaye, meeshaan ubaahdaba waan taaganahay, waxaa intaasi sii dheer waxaan ahay sidii ruux ay dhagaha ugu jiraan samaacadaha yar yare e wax lagu dhageysto waxaanan mar walbo maqlayaa, codadka Borqan iyo Hooyadee Zawba'a,

Si halhaleel ayaan dharkii usiibay waxaanan kutuuray sariirta hoosteeda, waan iska soobaxay anigoo anfariirsan muddo dhawr maalin ayaan naxsanaa,

Habeen habeenada kamid ah ayaan kasoo daahay guriga waxaanan imid xili danbe, waxaan u imid qolkii aan degenaa oo alaabtii hanaankeeda labadalay, waxaa laga

qaaday sariirtaydii meeshay taalay waxaana ladhigay armaajada,

Armaajadana sidoo kale waxaa ladhigay meeshay sariirta taalay, dhamaan allaabtii ayaa sidaa la isu daba mariyay, waxaan layaabay dharkaygii aan wasaqda usiibay dhamaan way dhaqan yihiin wayna laalaaban yihiin,

Waxaan isaga qaatay inay gabdhaha walaalahay kashaqeeyeen, waan iska seexday balse habeenkaasi waxuu ii ahaa habeen dheer oo walaac iyo qaraw badan,

Subaxdii markaan soo kacay ayaan arkay dharkii ay Borqan hooyadeed isoo siisay ood umoodo in la ii diyaariyay, waan xirtay saa waa codkii Borqan oo ileh noo imaaw waanu kuu xiisnay,

Waxaan damcay inaan jawaab u celiyo, waxaanan weydiiyay halka ay joogto, waxay iigu jawaabtay Madaxafka agtiisa imaaw adigoo dharka qaba, waxaan imid meeshii ay igu balimisay, saa waa iyadoo geed meesha ah ku dangiigta, waxaan is dhaafsanay salaan waxayna ii dhiibtay faraanti ay gacanta kuheysay iyadoo maqribkii igu balamisay Xeebta,

Waanka soo tagay labalabayn dheer kadib waxaan iska aaday balantii markii lagaaray, maqribkii ayaa kulanay, maanta waxay ii kaxeeysay jiho kale oo igu cusub, hal mar ayaan kabaxaynay jawigii aan ku jirnay waxaanan gelnay jawi roobeed, dhul aad uqurux badan iyo

maqaayado xeebta safan oo ay lamaanayaal labo labo u fadhiyaan,

Waxaan qaadanay fadhigeena waxaana isla markiiba naloo keeney cabitaano ka nooc ah, waxaanan guda galnay haasaawaheenii,

Borqan oo hadalka inoo bilaawday ayaa tiri, aniga saaxiibtinimo caadiya ayaan kuu bartay laakiin hooyaday waxay kuula mucaamishay sida nin iguursan raba,

Waayo dhaqankeena waxaa weeye hadii ay hooyada wiil gabadheeda lasocda ay u hadyayso dhar waxay kadhigan tahay siismo, hooyo arintaasi waankala hadlay inbadan oo waliba waxaan usheegay inaan Insi iyo Jin kala nahay balse hooyo waxay ku adkeysatay inay ikaa siisay,

Aniga runtii waankaa heley farxad ayayna ii ahaan lahayd hadaad iguursan lahayd, laakiin wali waxaa jira caqabada ah inaan kala nahay labo dad,

Cayduruus aniga wax walbo waankugu qaadan lahaa hadii aan xal uheli lahaa caqabadaas, noloshaada kama dheeraanayo inta aad heysato faraantigaas aan ku siiyay,

Intaas kadib waxay iga dhunkatay labada daan waxayna igu tiri macsalaama hadaad iibaahato faraantiga iyo dharka xiro waankuu imaanayaa,

Waxay iitimid labo jeer oo aan caawimaad oga baahday mar waa markaan kuguuleysanayay tartankii orodka

marna waa mar aan imtixaan galayay labada jeerna way i caawisay dib danbana ulama kulmin ilaa hadda,

Markuu dhameeyey sheekada Cayduruus ayaan ku iri waxaasi waa been, Ahmed iyo Aamiin ayaa igu raacay laakiin waxaa arinta soo dhax galay adeer Gurey oo meel dhinac ah shah ku cabaayay waxuuni ku raacay cayduruus, waxuuna yiri way dhacdaa in marmar jinka lala tacaamulo.

BARISAMAADKII IYO SOOMAALIYA, DOWLADDII HORE EE KACAANKA (SHEEKO)

Soomaaliya oo kamid wadamada dhaca geeska Bari ee Qaaradda Afrika ayaa lagutiriyaa hadana inay kamid tahay wadamada ugu kheyraadka badan marka laga eego illaha dhaqaalle ee uu wadanku leeyahay,

Tan iyo Markii Soomaaliya ay xornimada kaqaadatay gumeystihii sanadii 1960kii ayaa waxaa wadanka soo maray xukuumaddii ugu horeysay ee uu madaxa ka ahaa Madaxweynihii ugu horeeyey dalka AUN Mudane Aadan Cabdille Cusmaan(Aadan Cade), Waxaana ku xigtay Xukuumaddii uu madaxweynaha ka ahaa AUN Cabdirashid Cali Sharma'arke iyo xukuumaddii ugu dambeeysay uguna awooda badneyd ee milatariga aheyd ee uu madaxda ka ahaa AUN Jaalle Maxamed Siyaad Bare taasoo wadanka katalinaysay labaatan muddo sano ah,

SHEEKO IYO SHAAHID

Xiligani oo uu dalka wax soo saar yeeshay ayaa waxaa larumeysanyahay in horumar lataaban karo laga gaaray dhanka dhaqaallaha,

Waxuuna dalka yeeshay warshadaha Sonkorta, Hilibka, Kaluunka, Bariiska,taraqa, galayda iyo kuwa kale,

Sidoo kale waxaa dalka laga hirgaliyay mashaariic wax soo saar oo ah dhanka beeraha ah, Waxaa gabi ahaanbo isbadalay bilicda dalka, waxayna caasimada Muqdisho noqotay caasimadahii ugu bilicda iyo nadaafada qurxoonaa Qaarada Afrika,



Taalada Sayidka,



Taalada dhagaxtuur

Xuquuqda Sawirka (Alamy Stock)

Muqdisho waxay aheyd meel nabdoon uu horumar badan kamuuqdo waxay hoy u aheyd Malaayiin Soomaali ah,Waxaa kajiray amni iyo kala danbeyn,

Waxay Soomaaliya aheyd wadan dhaqaalihiisu uu kor ukacayo, illahiisa dhaqaalana waxay aheen kuwo si sax ah looga faa'idaysta,

SHEEKO IYO SHAAHID



Taalada Xaawo Taako



Daljirka Daahsoon

Soomaaliya waxaa laga isticmaali jiray lacagta Shilinka Soomaaliga oo xiligii dowladii Kacaanka tayo laheyd kana koobneed,

1 Shilin, 5 Shilin, 10 Shilin,

20 Shilin 50 Shilin, 100 Shilin, 500 oo Shilin iyo 1000 shilin.



10 Shilin Soomaali



100 Shilin Soomaali

SHEEKO IYO SHAAHID



500 Shilin Soomaali

Waxyaabaha Sheekadan laga Faa'iidaysan karo

1) In Soomaaliya ay laheyd dowlad adag oo cidina kusoo xad gudbi Karin
2) Dalka inuu dhisnaa oo uu bilc iyo quruxbo lahaa
3) In dalku lahaa dhaqaalle dadkuna ahaayeen dad isjecel

SOOMAALIYA XILLIGA COLAADAHA (SHAAHID)

Kadib Burburkii 1990 kii Soomaaliya waxay gashay jahawareer iyo colaad sokeeyo oo aanan loo aabo yeeleyn Birimagaydada, Waxaa loo gacan qaaday waayeelada, Waxaa udubka laga aslay caruurta, waxaa la umulo dooxay haweenka, waxaa qudha laga jaray Imaam salaada soo tujiyay, Waxaa dhegta dhiiga loo daray Salaadiinta, Abwaanada, Fanaanada iyo walibo dhaqaatiirta,

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxaa la boobay hantidii qaranka,waxaana lagu darsaday tii shacabka waxaa la burburiyay goobaha wax barasho, waxaa la qixiyay rayadkii iyagoona qaxooti ku noqday dawladaha deriska ,

Waxaa la Illaaway Soomaalinimo, Waxaana tabar iyo awood laga raadiyay qabiil iyo kala qoqobnaan, Waxaa gablamay Hooyooyin, waxaa gabi maran soo istaagay Aabo, waxaa asaay loo saaray saare inan aroos ah,

Dadka intaasi dhib ah loo geystay ayaa waxaa ugu sii darsamay colaadda, abaar aan kala go' laheyn, Cuduro aan gargaar laheyn, waxaa lajaray dhirtii, waxaana nabaad guuray dhulkii, waxaa yaraaday roobkii, waxaana dhulka ka idlaaday dooggii, waxaa carartay oo xuduudaha talaabtay ugaadhii,

Waxaana dhulka laga waayay goosin, ilaa ay xooluhu mid mid uqur baxaan, waxaa tayo beeshay lacagtii, waxaana latuuray inteeda badan,

Lacagta Soomaalida maanta la isticmaalo ayaa ah 1000 Shilin Soomaali ah, mana jirto lacag kahooseeysa iyo mid kasareeysa, Manajirto Sarif lacagta Soomaaliga ah iyo Baaqi la isu celiyo.



1000 Shillin Soomaali

SHEEKO IYO SHAAHID



Ilmo nafaqo daraysan



Ciyaal feel ugu jiro raashin



Dabaq Burbur kamuuqdo



Warshaddii Sokorka Mareereey

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxaa Sheekadan laga faa'iidaysani karaa

1) In Soomaaliya ay waysay dawladeedii horumarkeedii iyo Ilbaxnimadeedii,
2) In ay qasab nagu tahay inaan soo ceshano awoodeenii

FARIINTII ILMAHA AAN DHALAN (SHEEKO)

Aabo Waxaa warqadaan kuusoo qoray ilmahaaga yare ee kujira uurka hooyadiis fadlan markaad aqrisato lawadaag Soomaalida,

Aniga maanta waxaa iibuuxsamay bishii sideedaad, Aabo Illaahay SW waxuu igu beeray uurka hooyaday, halkaas ayuuna igu irsaaqaa, Illaahay waxuu amaan igu siiyay makaanka hooyaday dhaxdiisa.

Halkaan ayaa ku cunteeyaa oo aan hurdaa marna soo toosaa, hooyaday waan ogahay inay dhibaatooyin kala duwan kala kulanto culeyskayga oo maalinba maalinta kadanbeysa kusii siyaada,

Waxay ladaalaa dhacdaa rafaad iyo dhib waxaase rafaadkaasi iyo dhibkaasi kadaboolay oo ka qariyay farxada ay igu faraxsantahay, way kala badbadataa oo farxad ayay la ilmeysaa markay dareento inaan noolahay.

Waxaan mar mar gaarsiiyaa xanuun waxaanan ka haraatiyaa caloosha gudaheeda, igama naxdo imana

habaarto oo xitaa masheegato haraantidayda, ee waxay kasii qaadaa farxad, waxay ii qaaddaa heeso ay igu amaanayso anigoo uurka kujiro, waxay Illaahay kabaridaa inay mar' uun indho isaarto.

Waxay sugi la'dahay dhalashadayda waxay kasii fakaraysaa magaca ay ii bixin lahayd, iyo mansilada sare ay igaarsiin lahayd.

Hooyo miskiin ah!!!

Waxay kusugantahay xaalad ay iyada un dareemi karto oo isagu jirta Farxad, Walwal iyo wax hiigsi.

Aabo hadduu Illaahay yiraahdo bil kadib waxaan usoo bixi doonaa aduunyada, Waxay idinka idin noqon doontaa maalintaasi aan aduunka imaado maalin farxadeed,

Adiga gaar ahaan Aabo waad igu farxi doontaa waxaadna dartay uqali doontaa neef weyn si aad iigu wanqasho,

Waxaad asxaabtaada lawadaagi doontaa farxadda dhalashadayda waxaadna bixin doontaa Infiito aniga dartay,

Adiga waxaa kaa darnaan doonta hooyo oo iyadoo umul ah oo jirkeedu, jarjaran yahay dhiigana uu sida biyaha uga socda haddana farxad lawaalan doonto,

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxay ii galin doontaa dhar ay ii sii diyaarisay waxay maalintii idhunkan doontaa malaayiin goor iyadoo igu habeeyso naaska,

Anigu tabar kale malihi oo aan oohin ahayn waayo mahadli karo, sidaasi darteed waxaa ku dul ooyi doonaa habeen iyo maalin hooyaday, iyadana ima dhibsnaeyso ee waxay garan doontaa wax walboo aan ubaahado,

Aabo aduunyadu waa meel quruxsan oo jawi macaan leh oo iftiin ah, laakiin waa aduunyadee?

Ma aha midda aan aniga ku dhalanaayo, aniga waxaan hadda ka walwalsanahay wadanka uu Illaahay iga dhalin doono,Waa Soomaaliya!

Inkastoo ay dadkayga Muslimiin yihiin hadana waxaan ogahay inay yihiin, dad islaaya, isqarxiya, qabiil iyo qoloqolo isu heysta,

Aabo dalka aan u nasab sheegani doono waa dal ay dadkiisii burburiyeen walina ay usii hanweyn yihiin inay sii qoqobnaadaan ama ay kala qeybsanaadaan,

Aabo Macaan waxaan is weydiinayaa marka aad dhalato kadib maheli doontaa Amni aadku noolaato?,

Sidoo kale waxaan isweydiiyaa, tolow wadankaagu maleeyahay adeegyo caafimaad oo lagugula tacaalo markaad jirato adigoo dhaalaan ah?,

SHEEKO IYO SHAAHID

Sidoo kale waxaan ka fakarayaa markaan wax barasho gaaro tolow wadankaagu maku filnaan doonaa inaad kahesho wax barasho tayaysan aniga iyo kuwa ila midka ah?

Aabo markaan qaangaaro dabcan waxaan ubaahan doonaa shaqo, guur IWM laakiin wadankayga maadaama ay hadda kuwii qaangaaray ka tahriibayaan, wadamada qalaadna uu cadawgu ku qalanayo kalana baxayo xubnaha muhiimka ah, Makula tahay inaan anigana ka duwanaan doono kuwaas oo aan heli doono waxaan ubaahanay?,

Aabo Su'aalahaasi iyo kuwa kale oo aan qoraal kusoo koobi Karin waxay mugdi galiyeen rajadii aanka lahaa aduunyada,

Waa Ilmahaaga uurka kujira.

Waanku jeclahay Aabo.

Markaa bogay aqrinta warqada ayaan hurdada katoosay saa waa kaligay, waxan oo dhan riyo ayay aheyd waxaan ku orday xaaskayga oo Firaash dhulka yaalla ku jiifta, waan toosiyay waxaanan weydiiyay, Ilmaha ay uurka ku siddaa inta bilood uu yahay, Waxay iigu jawaabtay sideed bilood ayaa maanta ubuuxsantay, waxaan sidoo kale weydiiyay inay uheesto oo ay waliba Illaahay uga barido inay ilmaheeda mar uun aragto,

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxay igu tiri haa maalin walbo ayaan sidaasi kuheesaa, markaas ayaan garwaaqsaday inay fariintaani riyo aheyne ay dhab iigaga timid ilmahayga kujira uurka hooyadiis.

Waxyaabaha laga faa'iidaysan karo sheekadan

1) Fariintan waxaa sheekada inooga dhadhamaya inay anaga nagu socoto oo cunugga yari uu noo hoga tusaalaynayo inaan burburinay dalkeenii walina aan usii hanqal taagayno burbur kale,
2) Waxaa kaloo aanka faa'iidaysan karnaa sheekada in dalkeena uusan laheen adeegyada bulshada oo tayaysan,

WAAYEELKA MAANTA (SHAAHID)

Inta badan waxaa dadka waaweeyn lagu tilmaamaa Soomaalida dhaxdeeda dad aragti dheer, Xog ogaal ah oo waaya arag ah, waxaa loogu yeeraa magacyo ay ka muuqato ku qanacsnaan iyo sida loola dhacsanyahay xikmadooda iyo nabadoonimadooda,

Waxaana loogu yeeraa Nabadoon, Beeldaajiye,Garcas, Garyaqaan,Gareen iyo magacya kale oo badan, Sidoo kale waxyaabaha cadaynaya inay Soomaalidu aad u qiimeyso odayo dhaqameedkooda ayaa waxaa kamid,

Aalaaba waxay Soomaalidu udoortaan hogaanka beelahooda oday, iyagoo u bixiyo magacyo katurjumayo hadba meesha ay joogaan ama lahjadooda iyo martabada

qofkaasi leeyahay, waxaana kamid ah, Suldaan, Malaaq, Ugaas,Garaad ,Islaan, Wabar IWM. Mana dhacdo taariikhda inta badan jagooyin ceynkaas ah in dhalinyaro loo dhiibo,

Marka arintaasi waxay daliil utahay inay Soomaalida odayo dhaqameedkooda qiimeyaan inkabadan inta ay qiimeeyaan dhalinyarada iyo barbaarta lagu tuhmayo xoog, iyo hawl karnimo ay keentay da'yarnimadooda,

Odayaasha muggaas iyo mansabkaasi bulshada ku dhax leh oo warkooda loo dhagaysto sida mas'alo diini ah oo lagama maarmaan ah, waxaa muhiim ah inay taladooda iyo ra'yigooda uu saliim ahaado, saliim ka ahaado ceebaha, hadiise ay dhacdo inuu qaloocdo ama si un uga hooso waxuu khaladkaasi saameyn karayaa bulsho dhan oo meel dagan,

Sikale hadaan udhigo, dhalinta ama da'yarta marka ay suuqa yimaadaan ama goobaha lagu shaheeyo waxay afkooda dhawraan odayaasha iyagoo kutuhmayo xigmad iyo waayo aragnimo, balse haddii ay dhacdo in odaygaasi uu sawir khaldan dhalin yarada tusiyo waxaa soo boodaya natiijo khaldan,

Waxaan dhamaanteen kawada dharagsanahay inaysan jirin dhalinyaro inta ay golle isagu yimaadaan hadana garama ama kawada hadla arimo iyaga dhaxdooda ah.

SHEEKO IYO SHAAHID

Hawshaasi waxaa inta badan qabta odayaasha, gartaasi haddii la isku mari waayo waxay keentaa colaad ama dagaal ay odayaashu halkaasi kusoo go'aamiyaan.

Waxaan sidoo kale ogsoonahay in haddii ay colaadaasi timaado ama dagaal la isu qaato, dadka dhibkaasi ubareera oo dagaalka gala ay ahaadaan dhalinyaro.

Waxaana goobahaasi oo kale ku gablanta hooyo waxayna kuwaaysaa curudkeeda oo ay ifka ka eeganeyso,

qaladkaasi madhalinyadaa sabab u ah mise odayo?

Waxaan marqaati kanahay in oday dhaqameedyadu ay intooda badan u adeegaan arimo qabiil, Wali ma aragtay akhristoow oday dhaqameed aanan qabiil ku lug laheyn?

Bal dhugo sheekadan!

September afarteeda 2014 ayaa waxaan goob lagu qaxweeyo ku kulanay oday aan islahaa malaha xikmad ayaad ka faa'iidi doontaa, Waxaan dhararay sugidda inta uu afkiisa kala furayo,

Waxaanse markii danbe kashalaayay inaan waqti kulumiyo maxaa yeelay waxa odayga afkiisa ka imanayay ayaa aheyd hadalo aan macno laheyd ama aad ka dareemeyso dhinac xun wax ka eegid,

Waxuu afkiisa gaaray qof walbo oo meeshaasi fadhiyay isagoona kula dooday arimo qabiil iyo in beeshiisa

dulmantahay IWM oo uu jeclaan lahaa in mar uun uu dhaco dagaal umulo doox ah oo Soomaaliya gudaheeda la isku fara saaro,

Halka mar oo uu aniga ila dooday ayaa waxay aheyd mar'aan saabir oo dhinacayga fadhiyey ku iri magaalada waxaa ka muuqdo horumar oo waxaa naloo hirgaliyay leerarka cadceeda ku shaqeeya oo wadooyinka dhamaan laga suray.

''Saabir ayaa waxuu kujawaabay haa, Waa Illaahay mahaddii''

''Odaygii ayaa sheekada soo galay oo yiri, Waxaasi micna malahan oo waa iska mashruuc nin soo qaatay oo uu nagu dul cunayo laba bari kadibna batariga iyo soolarka ayaa laga xadayaa'' Intaan yaabay ayaan ku iri, Adeer mashruuca uusoo qaatay nin Soomaaliyeed oo aad adigana ka Faa'iidaysatay oo wadadii laguugu ifiyay, maxaa dhib ahoo kujira?

''War waxani waxaa surayo soolarka waa tuugo,kuwa cunayana waa tuugo''

Markuu intaasi Marinayo ayaan ka aamusay oo aan soo xasuustay hadalkii gabyaagii caanka ahaa ee noolaa waqtigii jaahiliga Nabi Maxamed NNKH kahore ee ree Carbeed Zuheir Ibn Aba Sulma, Markuu oranayay,

SHEEKO IYO SHAAHID

وَكَاءٍ تَرَى مِنْ صَامِتٍ لَكَ مُعْجِبٍ زِيَادَتُهُ أَو نَقْصُهُ فِي التَّكَلّمِ
لِسَانُ الفَتَى نِصْفٌ وَنِصْفٌ فُؤَادُهُ فَلَمْ يَبْقَ إَلا صُورَةُ اللّحْمِ وَالدَّمِ

Waxuu leeyahay Zuheir

Badanaa inta aad arkayso mid aamusnaantiis ku cajab galisay, Siyaadadiisa iyo Nuqsaantiisa aadku ogaanayso hadalka,

Carabka qofka waa Gobal,Gobalka kalana waa Wadnaha wax sooharayna waa un hilib iyo Dhiig,

Waa kii markale lahaa Zuheir,

وَإَنَّ سَفَاهَ الشَّيْخِ لا حِلْمَ بَعْدَ وَإِنَّ الفَتَى بَعْدَ السَّفَاهَةِ يَحْلُمِ

Waxuu yiri,

Waalida ninka weyn wax degenaan ah kama dambeyso, laakiin nin dhalinyarada ahi waali kadib ayuu dagaa

Tankale qofka ha yaraado ama haweynaado haddii ay xumaani badankiisa kujirto mar ayuu lasoo baxayaa oo uu bulshada ula imaanayaa,

Waakii Zuheir markale lahaa,

SHEEKO IYO SHAAHID

وَمَهْمَا تَكُنْ عِنْدَ امْرِئٍ مَنْ خَلِيقَـةٍ وَإِنْ خَالَهَا تَخْفَى عَلَى النَّاسِ تُعْلَـمِ

Qofka haday usugnaatay dabeecad, Haduu go'aansado inuu qariyo xitaa waala ogaan.

Dhamaan sadaradaan Zuheir marka aad dhuuxdo xikmada kujirta waxaa kuu muuqanaya in hadduu odaygu xumaado aanan wanaag danbe laga sugeyn, Sidoo kale in da'du iyo muuqaalka qofka aysan waxba tarin haduusan caqli jirin,

jirka ibna Adamkana labada xubin ee qofka lagu qiimeeyo, Waa carabka oo asal u ah siduu uhadlayo, iyo qalbiga oo ah siduu ufikirayo waxa soo harayna ay un tahay hilib iyo dhiig ,

Dulucda sheekadan waxaa weyaan in odayaashu is saxaan oo ay is toosiyaan waxay asal utahay isa sixidda iyo istoosinta dhalin yarada, laakiin Oday qabyaalad u adeega marna wax masaxayo oo matoosinayo,

Waxyaabaha Sheekadan laga faa'iidaysan waxaa ka mid ah

- In odaygu haday talada ka xumaato uusan rajo laheyn,

SHEEKO IYO SHAAHID

- In dhalintu waxyaabo badan oo uu odaygu goconayo ay ka fiyooyihiin,
- In caqliga iyo garaadku uusan ku xirneyn da' balse uu yahay hibo uu Illaahay dadka siiyo
- In hadiiba uu ra'yigaagu gaaban yahay ama uu xasarad keeni karo ay haboontahay inaad iska aamustaa,
- In halka ninka raga ah lagu qiimeeyo uu yahay qalbiga iyo carabka,

QALANJADII QEYBSAMI WEYDAY (SHEEKO)

Bari ayaa waxaa jiray wiil iyo gabar aad isu jeclaa waxayna kunoolaayeen meel tuulo ah, Wiilkaan iyo gabadhaan oo lagu magacaabi jiray Qamar iyo Qaalid ayaa waxay ahaayeen dad isku dhaw ilaa yaraantooda,

Waxay isla soo dhigteen dugsi Qur'aan waxay iyagoo ciyaal kusheekeysan jireen inay is guursan doonaan markay weynaadaan.

Markii ay Qamar gaartay sideed sano ayaa waxaa loo diray magaalada Gaarisa si ay wax uga soo barato,

waxayna ku biirtay iskuul gabdhaha gobolka kaliya wax lagu baro oo lagu magacaabi jiray North Eastern Province Girls oo loo soo gaabiyo NEP GIRLS balse Qamar ayaa

SHEEKO IYO SHAAHID

go’aansatay inay isaga baxdo iskuulkaasi iyadoona door biday inay ku biirto Iskuul kale oo lagu magacaabi jiray isna Umu Salama,

Qamar iyo Khaalid ayaa kala lumey maadaama ay labadoodaba da’doodu kayareyd heerka waalidiinta Soomaalida ay ubadkooda taleefan ugu iibiyaan

ayna waayeen meel ay ka wada xiriiraan balse war iskuma seeganeyne waxay labadoodaba midba midka kale kawareesan jireen dadka safarka ah ee labada deegaan ukala safra, aramida jeceyl ee labadan shaqsi ayaa waxay mar noqotay hadal heyta ugu weyn ee lagu sheekeysto magaalooyinka Gaarissa iyo Banaanay,

Maxaa yeeley labadoodaba marna kama aysan xishoon inay dadka usheegaan inay is jecel yihiin, gaar ahaan Qamar ayaa ardada unoqotay hooyada jeceylka iyada oo habeen walbana uga sheekeyn jirtay waayihii iyo waqtigii wacnaa iyo jeceylkii khaalid iyadoona wacad ku maritay in aysan marna ogolaan doonin nin aan khaalid ahayn,

Isaga qudhiisa kama yareestoo waxuu had iyo jeer wareeystaa waalidiinta Qamar.

qaalid oo ahaa nin mar walbaa xiisaynayo arimaha Qamar ayaa waxaa loo sheegay in ay qamar taleefan qaadatay waxuuna isla markiiba kasoo qortay lambarkeeda hooyadeed oo iyada lafteeda gabadheeda lajecleyd wiilkan,

SHEEKO IYO SHAAHID

Qaalid oo aan taleefanka gacanta heysan ayaa hooyadii kasoo qaatay mobeelkeedii waxuuna kushubtay kaarka kuhadalka, kadib ayuu latagay meel cidla ah si uu ula hadlo Qamar,

Wuu wacay balse lagama qaban, xoogaa ayuu joogay wuuku celiyay hadana lagama qaban inyar kadib fariin ayaa usoo dhacday waxaana loosheegay in hadda Qamar ay xiisad qaadanayso,

Qaalid taleefanka hooyadiis ayuu uceliyay waxuuna iska aaday suuqa, waxaana wajigiisa laga dheehan karay murugo, waayo waxuu aad ugu hanweynaa inuu mar'uun maqlo Qamar codkeeda.

Qamar taleefan jaanis umeysan helin maadaama ay aheyd xili ay daraasadaheeda maalinlaha ah qaadaneysay,

Maalin Sabti ah ayay Qamar nafis heshey waxay bilaawday inay wacdo eheladii iyo lambaradii soo baaqay taleefankeeda intii ay mashquulsaneed waxaana kamid lambarkii uu kasoo Qaalid oo dabcan iyada ku ahaa lambar cusub,markay wacday kadibna waxaa uga jaawaabtay Qaalid hooyadii Ruqiyo oo is wareysi kadib usheegtay inuu wiilkeeda magaalada kumaqan yahay uuna ka carooday xiriirin la'aanteeda, Qamar aad ayay uga walwashay arinkaasi waxayna markiiba aaday wabiga qarkiisa si ay maskaxda ugu soo degsato,

SHEEKO IYO SHAAHID

Iyadoo ilmadu ay dareereyso ayay waxay markale wacday taleefanka hooyo Ruqiyo waxayna wareysatay bal inuu Qaalid yimid iyo inkale waxaana lagu yiri wali ma imaan,

Kadib ayay kutiri hooyo fariin ayaan usoo qorayaa ee markuu yimaado ha aqristo,

Hooyo Ruqiyo oo aanan aqoon sida wax loo aqriyo ayaa tiri waayahay aniga waxaasi ma aqaanee usoo dir waan usheegayaa markuu yimaadee,

Waxayna uqortay geeraarkan,

Salaan qiimo badan, Qaayaheedu weynyahay

Oo qiiro iyo sharaf, Qoto looga dhigayoo,

Qeybaha jirkeygiyo, Kuwa dhiiga qaadiyo,

Quluubtayda oo idil, Soo wada dhax qaadaan,

Qormo kaaga dhigayaa, Qiilka aan uheystana,

Waa qawlkaaga wacan iyo, Qiyaastaad udhalatee,

Qaadir kugu maneystee, Qaalid waad i qaadoo,

Kaa quusan maayee, Qaladkiyo xumahaan,

Qasadka aan usuubin, Ha ii qabanin gacaliye,

Marna ficil ha qaadin, Haka fogaan qudheyda,

Qaado hadiyad weeyee, Laabtaada igu qoro,

SHEEKO IYO SHAAHID

Qoys xalaal ah iga dhigo, inta aanan qur bixin,

Waxooga kadib ayuu Qaalid yimid waxaana loosheegay in fariin utaalo taleefanka ayuu labooday waxuuna aqristay geeraarka,

Nasiib daro Qaalid ma ahan hal abuur oo geeraar ma alifi karo laakiin waxuu markiiba ku cararay asxaabtiisa waxuuna uga waramay siday wax ujiraan,

Ciise ayaa yiri anigaa ku caawinaya ee dhagayso heeso ayaan kuu shidayaa mida aad ka hesho ayaan uqoreenaa, Waa nin jeceyl hayee waxuu markiiba ladhacay heesta Cumar Shooli kuluuqeeynayo ee caanka ah, waxayna heestu aheyd sidatan,

Nin Jeceyl Wareemayoo, Waagii baryaaba

wanaagaduu jeclaa, Dadka weydiiyaan ahay,

Ruuxaan Wareystaba, Aniguu i waanshaa,

Waali igu tilmaamaa, Walwal igu abuuraa,

Anigana Warkoodiyo, Wacdi uma dhagtaagoo,

Wabiyada Bulhaamiyo, Shimbirahaan Wareeystaa.

Alla Waayayee, Walbahaarayee,

Igu Wiirsay Caashaqu, Yaanka weheshadaa,

Heestan oo aad dabcan u moodo inay labadooda kahadleeyso ayaa markii ay soo gaartay Qamar waxay sii

laban laabtay walwalkii iyo murugadii kaheysay kala maqnaashahooda.

Qamar markaan waa 16 jir waa gabar qaan gaar ah, waxayna lasoo baxday qurux iyo bilic ay dhamaan uga dhax muuqatay jiilkeeda,

Qamar Waxaa damciyay Ustaad Cumar oo macalinkeeda ahaa oo ku haminaya inuu hanti inta ka bixiyo mar'uun uu naayaa yiraahdo,

Waxaa sidoo kale Qamar si gaar ah u ilaashanaya wiil ay ilma adeer ahaayeen oo Qurbaha fasax yar uga yimid oo malaha guriga eedadeed ku arkay isaga qudhiisana gurigaa ayuu kusoo dagay, waxaana hoosta ugu xariiqan inuu isla marka uu qurbaha kulaabto horey kasoo doona Qalanjadan kadibna dhoofsado,

Waxaa intaasi oo dhan kadaran duq xareed oo adeerkeeda laxmiya ahaa ayaa waxuu meel fagaaro ah Qamar kusiiyay nin Barasaab ahaa oo la oran jiray Najiib oo mar ay abaari jirtay ceel deegaankooda uga hirgaliyay,

Qamar waxay iyadu niyada kuhaysaa Qaalid balse ma ogee waxaa kuloolamaya rag inay hanta ku bixiyaan helideeda diyaar u ah,

Waxaa Gaarisa yimid Qaalid oo cidladii inta udulqaadan waayay go'aansaday inuu waxbarashadiisii halkaa ku dhameysto,

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxa layaabka leh oo ay dadka ku dhaqan magaaladi qaadani waayeen ayaa waxay aheyd markii ay Qamar soo dhaweyneysay saaxiibkeed maxaa yeelay waxay gaari usoo sharaxday si cajiib ah waxayna uga hortagtay boosteejada basaska, Gaariga waxyaabihii lagu soo qoray waxaa kamid ahaa ereyadan, ‘‘Karibu Rafikiyango,Karibu Mapenzi’’ ereyadan oo ah Afka Sawaaxiliga ayaa macnaheedu yahay, Soo dhawoow Rafiiqaygiyoow, soo dhawoow Jeceylkeygiyoow,

Waxaa sidoo kale ku qornaa ereyo Af Soomaali ah oo ay kamid aheyd Jumladan, ‘‘Gacaliye aduunyada oo dhan ha i ogaatee, marna kama xishoonayo inaan sheego Jeceylkaaga,

Waxay kaloo Qalanjadani loo wada hanqal taagay waday hadiyado isagu jiro cuntooyin macmacaan iyo hadiyado kakooban dhar laxirto iyo saacad oo ay boorsad yar kuwaday, waxaana hadiyadaha kudhex jiray boqolaal kaar oo si qurux badan uxardhan oo ay dabcan isaga usoo iibisay, waxaana kor uga qornaa ereyo luuqada Ingiriiska ah oo jeceyl ahaaa, waxaana kaxusi karaa,

I hide my tears when i say your name,

But the Pain in my heart is still the same,

Although i smile and seem care free,

there is no one whom i love more than i love you,

SHEEKO IYO SHAAHID

Oo macnaheedu yahay, Waan qariyaa ilinteyda marka aan oranaayo magacaaga,laakiin xanuunka qalbigayga wali waa sidiisii inkastoo aan muusoodo oo aan umuuqdo qof aan waxba dareemin, majiro qof aan u jeclahay sida aan adiga kuu jeclahay ookale,

Sikastaba ha ahaadee jecelka intaasi la eg ayaa waxuu yeeshay cadaw badan oo mid waliba sita hubkii uu ku weerar tagi lahaa si uu uhelo qalanjadani aan qeybsamin,

Hubka ugu culus waxaa malahayga sita Qaalid oo waa Jeceyl labada geesba ka jira kuna xoogeeystay qalbigooda,

Ustaad Cumar, Guleed oo uu adeerkeeda dhalay iyo Barasaabkaba waxay ku kalsoonyahiin jeebkooda oo waxaa kadhaadhacsan inay iibsan karaan gabigeedaba,

Guuleed waxuu lasoo hadlay eedadii si gabadha loogu doono,

Waaloo doonay balse hooyada Qamar oo gabadheeda iyo arinteeda lasocotay ayaa diiday, Ustaadka ayaa isagana doonay waxaana kahor istaagay isagana adeerkeed oo Barasaabka larabay,

Barasaabka qudhiisa waxuu soo dhiibay gaari oo uu ugu talagalay inuu reerka arintiisa gogol xaar uga dhigo waxaana lasocday hadiyad iyo lacag badashay hab nololeedkooda, laakiin waxuu jahawareerka ugu weyn

yimaaday markii ay Qamar soo istaagtay marabo ninkaan oo aniga qof baan jeclahay,

Adeerkeed oo runtii bixiyay inanta ayaa ku adkeystay inay Barasaabka guursanayso ama uu eyada aduunyadu dhaafinaayo,

Dhanka kale waxa Qaalid qorsho umaleegay Guuleed oo arinteeda uyimid balse istusay inaanu waxbo usuuro galayn intuu Qaalid noolyahay, sidaasi awgeed waxuu u adeegsaday tuugo si ay nafta udhaafiyaan wiilkani loo maara waayay,

Qaalid ayaa waxaa soo hujuumay tuugadii waxaana lagaarsiiyey dhaawac badan oo toori iyo baangado loo isticmaalay, waxaana isla markiiba laseexiyay Isbitaalka weyn ee magaalada Gaarisa,

Arintan ayaa waxay saameyn kuyeelatay Qamar oo dareentay in Qaalid darteeda loo dili karo sidoo kalana inuu adeerkeed iyada nafta dhaafin karo haddii ay amarkiisa diido,

Sidaasi darteed waxay ciyaartay ciyaar cajiib ah oo waxay adeerkeed kutiri arooska Barasaabka ayaan diyaar u ahay laakiin lacag aan isku sii diyaariyo ayaan rabaa,

Barasaabka oo arintaasi aad ugu farxay ayaa waxuu usoo dhiibay xirmooyin lacagta Doolarka Mareekanka ah,

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxayna sidoo kale lacag ka galaafatay Guuleed oo ay isagana usheegtay inay ogalaatay guurkiisa,

Laba maalin kadibna waxay kireysatay gaari waxay Cusbitaalka weyn ee magaalada Gaarisa ugu tagtay Qaalid halkaasoo ay kala soo baxday isaga oo aan wali boogihii bogsoon waxayna ula soo baxsatay saaxiibkeed Soomaaliya,

Qamar Waxay noqotay Qalanjadii lawada doonay laakiinse ma noqon qof u qeybsamta intaasoo ruux waxayna ugu danbeeyn eyada iyo wiilka ay ku riyoonaysay ku aqal galeen caasimada dalka Soomaaliya Muqdisho halkaasoo ay si baraaro leh ugu noolaadeen,

MURTIDII IYO SUUGAANTII HORE(SHEEKO)

Soomaalida waxay ahaayeen dad ku faana hal abuuradooda iyo murtida ay curiyaan, taasina waa sababta dhulka Soomaalidu caalamka kale ugu aqoonsadeen dhul maansadu asal utahay waxayna ula baxeen (Nation of Poets) Wadankii ama Qarankii Hal abuurada ama Abwaanada,

Sidaynu wada ogsoonahay Soomaaliya waxa Murtideeda iyo gabayadeeda kor uqaaday hal abuuro caalamka ka yaabsaday oo aan ka xusi karno.

SHEEKO IYO SHAAHID

1. Raage Ugaas Warfaa
2. Sayid Maxamed Cabdille Xasan
3. Qamaan Bulxan Yuusuf
4. Salaan Carabeey
5. Ismaaciil Mire
6. Cali Jaamac Haabiil
7. Cali dhuux Aadan Goroyo
8. Weerar Bulxan Yuusuf
9. Xasan Afcad
10. Abwaan Cabdullaahi Timacade
11. Abwaan Dhoodaan
12. Saahid Qamaan

Iyo rag kale oo aan halkan kusoo koobi Karin, Waxaana sida lasheegay hormuud iyo aasaas u ahaa gabayada Soomaaliyeed Raage Ugaas Warfaa oo ahaa ninkii afka Soomaaliga ukala qaaday Tix Iyo Tiraab oo aan ilaa iyo hadda unaqaano inaga waxuuna ablablayntaasi kusheegay tuduc kamid ahayd gabay uu isaga tiriyay balse aanu tuducdaasi kaliya kaheyno, waxuuna yiri,

Hadal waa Tix ama Tiraab Midkaa Tiraahdaaba,

Waxaa kaloo Raage uu ahaa ninka Gabayada salka udhigay una sameeyey Alanada isku sarta go'an iyo miisaanka aynu maanta adeegsano ee ah,

Hooyaalayeey,Hooyaalayeey Hoyaalayeey,Hooye.

SHEEKO IYO SHAAHID

Raage Gabayadiisa waxaan ka xusi karnaa, Gabaygani oo aan Soomaalida dhaxdeeda caan ka aheyn balse uu tiriyay maruu gabadhii u mehersaneed inta laga fasaqay ninkale lagu daray sida aan gabaygaba ka fahmi karno, waxuuna yiri,

- *Wax Madhmadhay nin maalkheyr cunoo maratadii buuxshay,*
- *Wax lamid ah naagaan meher uheyn malag nimuu saaray.*
- *Wax Murugo leh lululumo miir ku haray oo maalin lagu oomay.*
- *Wax lamid ah ninkii madi ahoo mawdku laxiriiro,*
- *Wax ismooday ninkii mayrax boqor maalin lagu duubay,*
- *Wax lamid ah margaaloow ninkii faro ku maansheeyey.*
- *Wax muqleysan xaajadii mardaba looga madax yeeley,*
- *Waxa mintiyay rag waa malag jiniye kii lamarin waayay,*

Waxaan sidoo kale maansada Soomaaliyeed aan ka xusi karnaa gabaygii caanka ahaa ee uu tiriyay Cali Jaamac Haabiil, Maruu Sayid Maxamed Cabdille Xasan uduur xulayay, Waxuuna yiri,

- *Badda mootan meydkii Fircoon, baa la moosiyaye*

SHEEKO IYO SHAAHID

- *Sir mitaminiyo meeqaanba way, kala masoobaane*
- *Kolkii ay majaro leexatee, xaajo marin dhaafto*
- *Murti qodob ku miisaaman baa, muranka noo dhaanta*
- *Madi cararta maqasheeda-koris, minow san baa dhaanta*
- *Marwo hadal xun maangaab ninkeeda, maqasha baa dhaanta*
- *Magoog been ah talo muuqatoo, marag leh baa dhaanta*
- *Hal miirshaw leh maya oo tidhaa, milow horaa dhaanta*
- *Mayey aafo miidhan ah abaar, mudhuxsan baa dhaanta*
- *Haddaan xididku maamuus lahayn, ma lihi baa dhaanta*
- *Mirta weerar dirir maalinoo, rag is madhshaa dhaantaa*
- *Mataan midiq ah laas miir ah baa, kuu mitabis dhaama*
- *Boqorkii mallaay dabi midgaan, xadhig martaa dhaama*
- *Masjidkii cibaadada ka madhan, lama mudaa dhaanta*
- *Mufti nacab ah Aw kula masoo, macallinaa dhaama*
- *Walaalkaan mushaawiro lahayn, maqanahaa dhaama*
- *Malab sun ah mariid laga kacaa, muudsashada dhaama*
- *Muslinimo nimaan kugu dhaqayn, mu'minimo khaas ah*
- *Gaal maxasta kuu dhawra ood, magansataa dhaama*

Waxaan kaloon xusi karnaa Gabaygii murtida badnaa ee uu tiriyay Xaaji Xaddi yey, ee ahaa Beerka ka ogsooni,

Waxuuna yiri,

- *Bawdada markii aan kajabay boqonka taagiisa*
- *Habeenkiiba wuu i biran lahaa bahalki cawl laaye*
- *Raggii buurta dheer igala baxay beerka ka ogsooni*
- *Ninka birinji inuu iga cuno ii bariidinayey*
- *Ee bar kaleeto ii tarayn beerka kqa ogsooni*
- *Bah cilaamo goortay aniga igu dul booyaysay*
- *Bah sadheysa baga inay itiri beerka ka ogsooni*

SHEEKO IYO SHAAHID

- *Ninka balad shishe iga jiree soona bixi waayay*
- *Ee inaan bogsado un jeclaa beerka ka ogsooni*
- *Laxaad waa baraaree hadduu ii bogsado lawga*
- *Oo biixiyaha Eebahay isagu keey beego*
- *Abaal bar ah, abaal budh ah abaal budh iyo dheeraad ah,*
- *Ninba kiisa kaan ugu badali beerka ka ogsooni*

Waxaan dareemi karnaa murtida iyo xigmadda gabayadaasi ka buuxo mana aha wax hal faallo lagusoo koobi karo,

Waxaa sidoo kale ogsoonahay in Soomaalidu aheeyeen dad aad u caqli badan indheer garadna ah,

SUUGAANTA IYO MURTIDA MAANTA(SHAAHID)

Iyadoo aynu wada ogsoonahay inaan kasoo jeedno Soomaalidaasi Af maalka aheyd ee murtida badneyd ayaan hadana kamaranahay xigmadoodii aragti dheeridoodii iyo Af tahanimadoodii,

Waxaa dhacda maanta in kunkii qof laga helo hal qof oo gabyaa ah ama gabay xambaar ah ama aabanba laga helin,

SHEEKO IYO SHAAHID

Waxaa sii lumaya Af Soomaaligii, waxaana sii badanaya ereyada qalaad iyo af suuuqa oo gabi ahaanba daaqada kala baxay ereyadii rasmiga ahaa ee Af Soomaaliga,

Xitaa heer ay saameeysay suugaantii, waxaa layiri nin ayaa maagay inuu gabyo sabankan aynu joogno waxuuna yiri sidatan soocota,

- Fikradayda uma fiirsadaan my friendaduye
- Vocabulariga I am Sorry bay ka firdhanayaane,
- Waa ficiladii James born amase Vandamme

Bal ufiirso ma Af Soomaalibaa mise Ingiriis.

Sidoo kale waxay waayaddii danbe Murtida Soomaaliada ka nooleyd heesaha oo ay abwaanadu waqti iyo juhdi ku bixin jireen, heesihiina imika waxaaba loo dareeray janaasadooda oo waa hore ayayba naftii ka qaadeen waxaana tusaalle kuugu filan heesaha hadda ladhagayso,

Sida Heesta oranaysa,

- Way Waddaa way sidea Falaq Falaq,
- I just wanna go inside dalaq dalaq
- Yarta waa malaq malaq

Iyo midka oranaya,

- Isii sisinta
- Suleeqaay
- Isii sisinta

SHEEKO IYO SHAAHID

Iyo Heesaha Uunsi, Fax iyo barbar iyo waliba kuwa kale oo badan,

Iyadoo aanan halkaan kusoo koobi Karin bahdilka iyo kutumashada kudhacday suugaanta ayaa haddana waxaa caadi iska noqday in sidaa loogu ciyaaro cidina aysan ka hadlin ama u istaagin dib usoo nooleeyntooda,

Waxaanan leenahay Soomaalida guud ahaan Illaahbaa umaqan, Eebe weyna haka saaro jahawareerka ay dhinac walba uga jirto,

SHEEKO IYO SHAAHID

MARAAJICDA

1. Kitaabka Qur'aanka kariimka
2. Kitaabka Mucalaqaatu Sabca,
3. https://www.nationalgeographic.com/archaeology-and-history/magazine/2015/10-11/antony-and-cleopatra/
4. https://www.sacred-texts.com/isl/arp/arp136.htm the marriage of Antar and Abla
5. https://play.google.com/store/apps/details?id=com.historyisfun.somalia&hl=en_US
6. https://www.bbc.com/somali/war-44521040
7. https://www.researchgate.net/publication/313599113_Isbeddal_siyaasaddeedka_cusub_ee_Soomaaliya
8. Sheekada Jeceylkii Jeceylka Galaaftay waxaa goob joog u ahaa Cabdullaahi Axmed Maxamuud
9. Sheekooyinka qaar Curis aniga ah, (Fariintii ilmahaanan dhalan)
10. *http://tusmaaleey.blogspot.com/2012/10/gaal-maxasta-kuu-dhawroo-magansataa.html*
11. *Buuga Tix iyo Tiraab ee diiwaanka Raage Ugaas*